# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA, GUDIYADA IYO GOLAWAYNAHA

**Kal-fadhigii 37aad fadhigii 5aad**

**16/07/2018**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga: -**

- Doodda Xog-ogaal u noqoshada Xaalada Dalka.

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaan bilaabaynaa dooda Xog-ogaal u noqoshada xaalada Dalka oo ajandaha inoogu jirta Qodobka labaada waxaan xog-haynta farayaa in ay soo qoraan mudanayasha ka qayb galaya dooda, waxaana ka qayb qaatay doodaa.

**Md. Xuseen Maxamed Cige: - (5Min 27Sec)** waxaynu ka hadlaynaa xaaladu dalku marayo, markaas waxaan odhan lahaa dalku xaalado adag adag ayuu marayaa, ta Tuko-raq ahaato, ta barriga ahaato ee ceerigaabo ama ceel-afweyn. Arrimo kale oo guuxayaana way jiraan oo bankaa wajaale ahna waa la sheegayay, mushkilada koowaad ee meesha taalaa waxa weeye xildhibaanadii dalka ee la soo doortay wax allaale waxaa socda wax aynu ka ognahay ma jirto oo wax TV aynu ka aragno iyo wax suuqa la inooga sheego moooyee wax aynu ka ognahay ma jirto. Waa nasiib darrada koowaad cidda dambiga lehna waa la soo saari doonaa oo waynu ogaandoonaa, oo ama inaga ayaa fadhiid ah oo aan shaqadooda qabsanayn ama ciddii la rabay inaynu shaqada wada qabano Ayaan inoo sheegayn haddii aynu nahay Golaha Wakiiladda.

Arrinta Tuka-raq waad ogtihiin oo muddo ayey socotay oo la inagu soo duulay, markaa anigu odhan maayo dagaalku muxuu u dhacay, laakiin waa la inagu soo duulay, waxay ahayd in Goluhu ogaado, oo qayb ka ahaado ileen kuway umaddu soo doorotay waa inagee. Waxa kale oo aan Jaraa'idka ka arkay niman salaaddiin ah oo tagay Garoowe arrinta dagaalkaas ka hadlaayey, runta haddii aad doonaysaan anigu arrintaas aad iyo aad Ayaan ula yaabay, waayo arrintaasi arrin qaranbay ila tahay oo salaaddinntaa tagay inay iyagu iska tageen iyo inay dawalddu dirtay war uma hayno, markaa waxyaabaha caynkaasi ahi waa waxyaabaha dalka kala faquuqaya ee aan la is ogayn ee ka dhigaya shaqo aan la wada lahayn. Waxaan odhan lahaa arrimaha qaranka in Goluhu lug ku lahaado.

Arrinta ceel-afweyna waynu ognahay. Waxa la yidhi nimaan aqalkiisa nadiifin kari aqal dibadeedna ma nadiifin karro, inaga oo tii guddaha wax ka qaban la in aynu ka dibbeda

isku qaadnaa suuro gal maaha, dagaalka dadka is laynaya ee walaalaheen aad iyo aad Ayaan uga xumahay. Waa laba reer oo aan kala maarmin oo walaalo ah weeye oo isu tabtiya oo ilmaadeera oo ninka dhintaa labada dhinac uu ka dhintay waa nasiib darro taasina way iska soo afjarmi doontaa insha Allaah.

Sida aynu miidhiyaha kala socono ama la sheegayo dagaalkaasi in badan ayuu soo noq noqday, 6 jeers 7 jeer inay tahay ma ogi meelahaas weeynaan. Waxa dhacday in mar walba in la gaadhay wax lagu heshiiyey oo qoraal ah meel wax la isla dhigay oo qoraal ah oo yaala in haddana dagaalkii soo noqday oo hadda sidii la sheegayey wixii la isku xugmay xukumadda oo la rabay inay fuliso aanay fulin. Halkaas wax aka muuqday in gacantii birta ahayd ee laga rabay inay xukumaddu qaado aanay qaadin diyaarna u ahayn. Waxay ahayd in Goluhu arrinta uu toos u galo oo uu hadal ka soo jeediyo xeerna ka sameeyo ciddii gardaran xeer ciqaab ah u samayso. Markaa nasiib darradda jirtaa waxa weeye dadku wuxuu inoo haystaa inaynu nahay fadhiid, markaa in aynu inagu ka baxno fadhiidnimada oo aynu ka fikirno oo ka shirno oo waxa la inoo hayato ka baxno oo fulino ayaa inagu waajib ah intaas Ayaan kaga baxayaa Asaalaamu calaykum Warax Matulaahi Wa barakaatu.

**Md. Siciid Cartan Cismaan: - (15Min 36Sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim wa bihii Nastaciin. Arrintan aad iyo aad ayaa loogu baahnaa oo saamayn ku leh xaalada dalku halka uu marayo oo xogogaal loo wada noqdaa waa shay inagu waajib ah. Saddex qodob Ayaan ka hadlayaa oo kala ah

1. Duruufta Gobolka Saaxil oo ah halka la iga soo doortay
2. Siyaasada Arrimaha Dibadda.
3. Siyaasada arrimaha Guddaha

Haddii aan ka hadlo xaalada Gobolka saaxil oo aan ku sugnaa saddexdii cisho ee ugu dambeeyey waxaan doonayaa in aan warbixin Golaha ka siiyo heshiisyo aynu halkan ka fulinay halka ay marayaan iyo wax ka qabsoomay iyo waxaynu ka dheefnay in la ogaado Ayaan halkan ka soo jeedinayaa. Haddaan ka hadlo dalkan Somaliland oo asadka uu lahaa uu ugu waynaa Dekedda Berbera. Dekedda waxa laga kireeyey muddo sanad iyo badh ka hore Shirka DP world. Heshiiskaas aynu galnay xaqbaynu u leenahay in heshiiska sidaynu u galnay inuu u fulay iyo inaanu u fulin waa masuuliyadda ina saaran. Heshiiskaasi sidii la rabay umuu fulin haba yaraatee.

Haddaan ka hadlo waxa inagu soo kordhay iyo xaalada dekedeenu marayso maanta ama ay ku sugan tahay waa xaalad aad iyo aad looga naxo. Malaha xogogaal badan uma tihidine. DP world waxaynu u dhiibnay Dekeda shaqaynaysa oo agabkeeda iyo qabalka ay ku shaqaysaa uu u dhan yahay, waxaynu ka eegaynay in muddo sanad iyo badh gudaheeda ay Shirkada DP world ay maalgashi badan ku samayso oo 400M marka hore ay samayso, 400M haddana ay samayso. Nasiib darradda dhacday ilaa imika DP world

waxaynu ka haynaa Dekedii dayr ayey ku wareejisay wax Allaale waxay dekedaa ka qabatay ma jirto. Qalabkii shaqaynayey ee dhamaystirnaa maalintaa waxyaabaha ugu muhiimsan 11 wiish ayaa shaqaynayey iyo qalabkii dekeda loogu adeegayey oo dhan. Maanta wax aka shaqaynaya wiishashkii saddex wish oo saliida cunaya.

Waxa dhacda marka loo baahdo in wax la rogo qalab dhisme oo ay keenaan iska daaye in qolada dhismaha wiishka laga kiraysto oo dekeda laga rogo marka dadku qaliyo oo uu tawaawaco waxay soo kordhiyaan iska daayo.

Qalabkii dekeda wuu wada fadhiistay, wax waxtar ah oo ay keenee waxa jira 10 tareele iyo 5 qalabkan wax lagu dadajiyo ah oo xitaa aanay tayadoodu fiicnayn. Dekedii mushkilada ka jirtaa waxa weeye koontiinarka waa la kaantarooli jiray oo waxay meel aynu danaynayno oo aynu ilaali naynayd ahayd, waa laga ilaalin jiray in aan seddex koontiinar ka badan aan la is dulsaarin waxba kama gelin iyagee ilaa 5 kooniinar ayey isa saarayaan. Dekedii waxay keentay inay imika dil dilaac keento oo shirkado local ah la yidhaa nab naba ayey dekdedii aynu filaynay in la dhiso ay maraysaa.

Shaqaalaha iyo duruuftay ku nool yihiin haddaan ka waramo shaqalalaha waxa joogaa ilaa 800 oo qaata mushahar aan joogto ahayn oo bilna 2000,000 ayaa la siiyaa bilna 4,000,000 ayaa la siiyaa bilna 5,000,000 ayaa la siiyaa waa calaa karaan. Mushahar joogto ah oo ay qaataan ma jirto, waxa jira 60 ajaanib ah oo ka shaqeeya, 60 kaasi waxay ka musharah badan yihiin 800 ee shaqaalaha ah ee jooga ee ajaanibka ah. Dp world waxay inoo qabato iska daaye waxaan ka cabsi qabaa into sidii tii Yemen ay kharaabiyaan in habeen madaw ay inaga guuraan.

Waxaynu taagan nahay xiligii laga hadli lahaa, reerku marka uu guurayo carruurta ayaa odhan jirtay hooyo caano isii hortu ha la dego. Waxaan leeyahay inaga heshiiskii dhankeena wuu ka dhamaadee waa inay hawshooda bilaabaan oo markii hore November ayey nagu maawaalin jireene, habeenkii 26 June Madaxweynuhu wuxuu ku sii laalay December 2019.

Waxa kaloo jiray saldhig military oo Golaheenu halkan ka anisixiyey, waxa saldhigaa raacayey in Waddana la inoo sameeyo garnoona la inoo sameeyo ileen carruur ma nihine labadaas qodob meel ayaa la iska dhigay oo imika waddii waxay sii socotay Ethiopia ayaa waddada dhisaysa, inagu heshiiska Emriate ayeynu la galnay waddo ay Ethiopia inoo dhisayso aniga macquul iiguma muuqato garoonkiina hadalkiisii waa la daayey oo saldhigiina maanta waxa uu marayaa ilaa 60% kii ay danta ka lahaayeen wuu socdaaye inaga danteenii meeday. Saldhigaa waxa lagu bixiyey $ 96,000,000 Million oo Dubia ayaa lagu bixiyey walaahi dhaynaha waxa wadda nin siira lanki ah shaqo kale oo laga faa'iido iska daayey shaqaalaha Dubai ayaa laga keenay waana Seera lanki iyo Hindi. Waxaynu mashaarciida u bixinayn in shaqo abuur ay dadkeenu ka helaan oo meel qandaraasyadaa lagu bixiyo cid ka war haysaa ma jirto.

Imika waxa weeye waa la dayrayaa oo waa la jeexayaa oo dad masaakiin ah dhulkoodii oo xuquuq leh ayaa dhulka baloodha ku lahaa maalin dhawayd waa la qiimeeyey oo waxa lagu qiimeeyey 137 Million. Xukumadu waxay doonaysaa inay dadkaas cagta maraisay oo shiliin loo celin waxa la yidhi calaa qof $ 20,000 ha loo celiyo. Waxay yidhaahdeen nagaa cagta marinayna yaan naloogu imanin waxaan qabaa inta ay igu lacagta account ku shubtaan dadka masaakiinta ah la boobayo. Waxaan leeyahay dadkaas masaakiinta ah ee abeesadu meesha ku cunayso Emirate uguma baahna in loo boobo.

Dadkani maaha second citizen markaa waxaan leeyahay yaan dadkaas loo dulaynin Emiarte ilaahay ayaa arsaaqada bixiyee, saaka cagaf ayaa ku jirta waxaan leeyahay dadkaas xaqooda ha la dhawro oo halaga daayo bahdilka.

Siyaasada dibedda waxaad moodaa inay haatan isa soo gurayso oo inagu soo ururayso, waxaad moodaa ninkii Wasiirka ahaa ee aynu arrimaha dibad u diranay uu yahay shaqaale DP world ah, wax allee wax jira Arrimihii dibedda oo dibada ka socdaa ma jiro, imika waxa la isku hayaa waar saradeenii Ethiopia miyey furan tahay mise way xidhan tahay oo la leeyahay waa la xidhayaa waar ha laga war hayo oo halaga war helo xaaladu halkay maraysaa waa halkaas.

Imika shir ayaa soomaaliya loo qabanayaa inaynu ka qayb galnaa xaaran ayey ahayd xukumadda waxaan ka rabnaa Faysal Cali Waraabe sababta uu uga qayb galay iyo cidda uu matalo taasna waxaynu rabnaa in wax la iska waydiiyo.

Siyaasada arrimaha Gudaha runtii waxa weeye dalkan doorashooyin ayaa ka dhacay raadad taban dalka kaga tageen, doorashooyinka waxa lagu galay qaab qabyaaladaysan burbur badan ayaa ka dhacay, dalka dhibaato badan ayaa ka soo gaadhay, waxa loo baahan yahay xanaftaa badan ee doorashadii ka tagtay in dalka iyo dadka dib la isugu soo ururiyo oo nimankii kuraasta doonayey oo haddii ay tahay ka fadhiistay iyo kii laga badiyey in gacanta dib la isku qabsado oo umaddii dib loo mideeyo ayaa loo baahan yahay.

Dagaalkaa ceel-afweyn oo runtii laba beelood oo walaalo ah oo aanu aad iyo aad uga xunay waan u ducaynaynaa siduu doono ha u dhacee, laakiin waxaad moodaa in imika arrinkii si wanaagsan loo waddo isaga waan u ducaynayaa waxaan leeyahay ilaahay sida khayrku ku jiro ha inoogu soo dhameeyo. Waayo umaddani waa walaalo mana kala maarto. Waxa dalka ku soo kordhay inaga oo fadhino in Cali kahaliif uu baarlamaan ku shiriyey oo sanad badh u kordhiyeen, waxaan leeyahay dawladu heshiisyadii ha keento ay la gashay khaatumo oo ha dhamayso. Waxa kale jira in salaadii tageen garoowe qaarna xamar u sii dhaafeen waana arrimo dalka ku cusub.

Waxa kale oo Iyana jirta nin la yidhaa Kornayl Caare oo arrin ciidan aan wax lagag qaban arrin reerna aan wax lagag qaban waana qalad horena umay dhici jirin wax maanacayaa

ma jiro in qaar kalena ciidan meel gaystaan. Waxaas oo dhammi waxay keenayaan in ay hoos u sii rifanto dawladnimadeenii dhaawacanto waxaan leeyahay dawlad iyo shicib waa in xaalada dalka meel looga soo wada jeestaa si aynu xaaladan uga baxno.

**Md. Cali X. Maxamed Muuse: -** **(12Min 00Sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Waxay illa tahay in ajedaneenu yahay xaalada gaarka ah ee dalka Gudahiisa iyo dibadiisa, waxay ila tahay arrimahaasi waa arrimo balaadhan hase ahaatee waan soo koob koobaynaa. marka ugu horaysa waxaan jecelnahay inaan ka bilawno Xaalada Baarlamaanka iyo Golaha. Waxa weeye haddaynu nahay Golaha Wakiilada waxaynu ka soo galnaynay iyada oo la yidhi mar kaliya ayeynu ku galaynaa xeerkii doorashada, maantana waxaynu caga cagaynaynaa 10 sano oo dhaw dhaw, ilaa hadda xeerkaasi sidii ayuu qabyo u yahay. Waxaynu ognahay Guddida nagadgelyada iyo arrimaha Gudaha ee aan ka mid ka ahay, waxaa jirtay in aan lixda Gobolba soo marnay oo si arrintaas iyadda ah looga midho dhaliyo aan go'aan uga gaadhno oo aan la soo tasho Gobolada. Shirar ayaanu u qabanay lixda Gobolba waanu soo marnay wixii aanu ka soo qornay Golaha Wakiilada ayaanu keenay, Golaha wakiiladuna Xukumaddii hore ayuu u gudbiyey ilaa iyo hadda xeerkaasi waxaan u malaynayaa inuu wali sidii u taagan yahay, wali lagama gun gaadhin haddii la yidhaahdo doorashadii labaad ayaa sanadka soo socda aynu qabanaynaa, dee ma garanayo sidii aynu go'aan uga gaadhi lahayn xeerkaas isaga ah wali waa qabyo.

Xalay waxaan dhagaysanayey Wasiirka Wasaarada Beeraha Axmed Muumin Seed oo kal hadlayaa arrintaas oo ka hadlaya arrintaas oo sheegaya niman xildhibaano ah oo Golaheena ah ku jira oo Gobolka Awdal ka soo jeeda oo uu leeyahay arrintaas ayey ula yimaadeen odayaasha oo saami qaybsigii ayey ula yimaadeen waxa uu yidhi marka waa in Golaha Wakiiladu marka hore ka soo hadlaa, waxa uu tusaayey xildhibaanada ka soo jeeda Gobolka Awdal ee Golaha ku jira in ay kicinayaa Bulshada, hase ahaatee anigu waxaan qabaa inayna kicinayn bulshadee inay tusayaan arrin wali qaydhin u jeedaan, waxaan leeyahay arrintaas iyadda ah wali sidiibay u taagan tahay walina waa qabyo waxaan leeyahay Golaha ha la horkeeno oo haddii aynu ku riixayno xukumada iyo haddii aynu inagu go'aan ka gaadhayno iyo haddii mar labaad Goboladii dib loogu noqonayo waa arrin inoo taala wakhtigiina waa cidhiidhi oo wax yar ayaa ka hadhay. Taasi waa taas.

Doorashada bwaxa kale oo weheliya kootadii iyo arrimaha dadkam laga tiro badan yahay, markaa waxaan leeyahay waa in aynu soo horaysiinaa ta doorashada maadaama oo ay wax yari ka hadhsan yihiin, waxa kale oo aan leeyahay Qolada Gobolka Awdal

waxaan leeyahay waatan ay marayso in wasaardii beeruhu ka hadlaysee noo sheega halka aad isla maraysaan.

Haddii aan ka hadlo dhinac nabadgelyada waa laba waa ta gudaha iyo ta dibeda. Haddii aan ku horeeyo ta xaga Gobolka Sanaag meel wanaagsan ayey maraysaa oo waxa laga yaabaa inay iska soo gabegabawdo barri ama saadambe.

Arrinta ku saabsan Tuko-raq waa arrin xuduud oo dagaal ah, dagaakak waxa weeye taqdiiro mawqif weeye oo saddex u kala baxa.  Cadawga oo aad qiimayso, Ciidankaaga oo aad qiimayso Iyo meesha aad ku dagaalamayso oo aad qiimayso.

Cadawgeena isada uu warku nagu soo gaadhayo waxa leeyahay way isa soo abaabuleen si fiican ayuu isu soo abaabulay xuduudka oo dhan ayuu yimid waxaana lagu qiyaasayaa ciidan ilaa 15000 oo askari ah, kolay keenu kuun ka badan yahay waanu ka qiimo weyn yahay intaas iyo saddex laabkeed ayaanu u badinaynaa.

Xaga dhulka dhul banaan weeyaan oo loo baahan in dhulka aad ku dagaalamayso aad ogaato ma banaan baa, ma buuraa ma magaalooyinbaa waa in aad ogaataa, laakiin taan anigu ku fikiraa waxa weeye waxa jira qish wa ikhtibaa, waxa weeye ciidanku haddii uu doonayo inuu ku khiyaameeyo intuu xuduud kaaga yimaado oo wax soo tuur tuuro ayuu dhinac kale kaa soo galayaa dhinac buuhoodle ciidamo fara badan ayey ku leedahay Somalia.

Arrinta ku saabsan siyaasada dinada aad Ayaan u liidayaa waanay jilicsan tahya, waxa loo baahan yahay qolada arrimaha dibada I arrintoodii ay hoos u dhacday waana inay xoojiyaan oo ay ka qayb gala shirkada dibada, xaga dekeda siciid Ayaan la qabaa intaas Ayaan ku soo koobayaa.

**Md. Cabdiraxman Maxamed Jaamac (Aw-xoog)** **(12Min 12Sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye, xildhibaanada iyo saafadana waan salaamayaa. Arrinkan in ajedaha lagu soo daro oo aad soo jeedintadii xogogaal u noqoshada xaalada dalka oo aad akhbasheen aad Ayaan idin Mahad celinayaa.

Xaalada dalka hadaan hoos ugu dhaadhaco waxaan ugu horaysiinayaa nabadgelyada, Sidii xildhibaanadii iga horeeyey ay sheegeen dunida waxaynu ka iibinaa waa nabad hadaynu nahay Somaliland. Nabadii waxaad moodaa inay faraha ka sii baxayso oo dawladnimadii ay sii rifmayso. Ciidamo hubaysan ayaa ka samaysmay Gobolka Sanaag, Gobolka Sool dagaal ayaa ka jira ama waa la is horfadhiyaa, Gobolka Awdal wuu ruxmayaa sababtuna waxa weeye waad ogtihiin bankii Wajaale iyo arrimaha ka taagan iyo mudahaaradii ka dhacay Dilla, Ayaan u leeyahay wuu ruxmayaa oo tabashooyin badani jiraan.

Anigu waxaan halkan ka dirayaa baaq nabadeed oo labada jifo oo hoose oo Somaliland ka wada tirsan Somaliland Gobolka sanaag, waxaan leeyahay, walaalayaal maqla culimo

aawdiinkaa iyo miri magaydadaa la idin soo diray reer Somaliland iyo Madaxweyne ku xigeenka si dhakhso ahna inooga dhamaystira, waa arrin ay madaxtooyadu ka habsaantay oo guurtidu waxaay gaadhay go'aan Guurti waan ognahay Wasaarada Arrimaha Guduhu inay dhabar jabisay arrinkaas, hase yeeshee midho daray duuduubkaa lagu liqaaye, waxaan u jeedinayaa labadaas jibo arrin kale oo Somaliland gudaheeda ka bilaabantee uma tag haynee walaalayaal dadkaas la idin soo diray yeela'oo nabadgelyada qaata, Ayaan anigu leeyahay.

Xukamadda cusubi waxay jirtaa todoba bilood, wakhti haddaan mucaaridka nahay ayaanu siinay bal inay hawlaheeda ku kala fuliso haddii daymo lagu lahaa, haddii kirro lagaga tagay iyo haddii meelo laga soo xidhay oo ay dawladdii hore ka dhaxleen in kasta oo ay isku xisbi ahaayeen wakhtibaanu siinay, wakhtigii todoba bilood ayuu marayaa. Xukumaddu waxay inagu istaadhay dagaal aynaan u baahnay hadda oo aanay soo marina Barlamaanka, in kasta oo dagaalku ka dhacay Gudaha Somaliland oo aanay dibad ahayn, haddana way fiicnayd in Golaha Wakiilada laga tashado arrintaas adagaalka. Waddanka aynu is ahaysanaa waa Somalia oo waddankeenii qaybo ka mid ah inagu haysata. Waxaanay imika leeyihiin xukumaddu waxay ahayd Golihii Guurtida sidii xukumaddahan Kulmiye u qabsadeen shaqadoodii waa laga qaaday, ilaa 2010 wasiiraa loo diraa halkii Guurtida looga dirijiray, imika arrinku nwuu ka sii hooseeyaayoo seddex suldaaniyo nin sarifle ah iyo dhawr ninoo suuqa jooga ayaa inta la ururiyey la yidhi hawshii Guurtida idinkaa ku kufilan nin Guraase la yidhaa ayaa ka soo daba hadloo wuxuu yidhi waxaas ay ku hadleen waxba kama jiraan.

Markaa waxaad moodaa in hawlihii Guurtida lala wareegay, oo wasiiro ayey markii hore ahayd ay imika noqotay oday dhamqameed oo waliba Somaliland badh laga tagay oo badhka aniga la iga doorto laga tagay, si badheedh ah ayaa loo diray markaa kala qaybsanaantii lahaa doorashaa kala qaybisay miyaan la sii wadin.

Arrinkii ay ahayd in xanaftii doorashadu ka tagtay la dhacayo in xitaa madax dhaqamadeedkii la diray laga tagay qaybtii wax tabanaysay ee Somaliland. Arrimaha dibedda wada hadalkii xukumadaha kulmiye la fureen, anagu markaanu UDUB ahayn waxaanu nidhi anagu nimankaas la hadli mayno sidaas ayaana inoo khayr badnayd, xukmadihii kulmiye waxay yidhaahdeen wada hadalada lacagbaa ku jirta, waxa ku jirta lacagta Budhcad badeedka, waxa ku jirta lacagta la dagaalnaka Argogixisada xagaa aynu lacagteena ka qaadano fari tog dheer bay kula xushaaye Somaliland way eeday wadda hadaladii ay Somaliland la furtay Somaliya. Waxa cadaynaya maamulkii hawada Somaliya ayaa la wareegtay deeqihii Jamhuuriyadda Somaliland tooska loo siin jiray waa la joojiyey, maanta ayaa la soo gabagabaynayaa yoo loo fadhiyta Brussels sidii loo soo xidhi lahaa, xamarna waxa laga kaxaystay niman ka soo jeeda Somaliland oo la yidhi anagaa Somaliland matalna dhaha, haddii ay Rasalwasaare ku xigeen noqon lahay, haddii Guddoomiyaha aqalka sare noqon lahayd, haddii ay wasiirka Maaliyadda noqon

lahay waxa la yidhi dhaha nimankaasi way edab daran yihiin oo waxba way maqli waayeen ka jara waxaad siisaan.

Halkan Somaliland waxa matalay Faysal Cali Waraabe iyo Cali Khaliif Galaydh Goormay noqdeen Wasiirada Arrimaha Dibedda Somaliland. Cali Khaliif Dawlada uu madaxweyne ka yahay oo uu furay Baarlamankeedii ayuu laascaanood ka furay oo dawlada khaatumo la yidhaa oo ka dhisan Somaliland ayuu guddoominayey imikana faysalbaa isaga oo wata mashruuciisii sii kaxeeyey.

Cali khaliif midnaa ka raacay oo ahayd in hseshiisyaddii xukumadaha kulmiye la galeen oo la dhamaystirin waxay hayd in la dhamaystiro oo cabashadiisa la soo afjaro, sida aynu leenahay colaadii ceel-afweyn oo taagan uma tag hayno kuwo kale oo khaatumo oo dhexdeena shirarkii ku qabanaysa waa in iyadan la soo afjaraa oo heshiiskii la dhamaystiraa.

Waxa kale oo yidhi nalagama tashan Cali khaliifoow adiga iska daayoo xitaa anaga oo barlamaankiiya nalagama tashan, Cali khaliif isku noqon maysid Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Wasiirka Arrimaha Dibedda markaa caliyoow arrinkaasna xukumadda kala hadaloo inaga soo gabagabeeya.

Arrimaha dibedda in badan ayaa Guddida Arrimaha Dibedda ahaa oo aanu tagnay todoba dal oo Africa ah, Ingiriisku wuxuu nugu yidhi markii aad noo dirteen 17 xildhibaan ee halkan ka tagay alle ha u naxariistee ay ragii tuke ay ka midka ahaayeen waar naga waxa nala odhanayaa farogelin gumaysi Africa ka doona aqoonsiga, xukumaddii UDUB waxay tagtay Tanzania, Rwanda, Gana iyo waddamo kale oo Africa ah oo Passport Somaliland lagu tagayey maanta meel qudha laguma tago balbaaka qudha ee aynu ka baxnaa waxa uu ahaa Ethiopia, Ethiopia Safaaraduhu waxa weeye safaarada, Qunsiliyad, mishan , lesiase Office maanta waxa la ina marsiinayaa in la yidhaa lesiase Office oo tii falastiinta ka hoosaysa markaa miyaan ooda loo soo rogin ciddii diidaysaa haddiide.

Wasiirka arrimaha Dibedda wuu ku fashilmay arrimihii dibedda, waxaanu galay arrimo baayac mushtar oo dubia ka dhaxeeya shirkan wuu u furtay, waxaanu leenahay wasiirku shaqadii loo igmaday ma hayo ee Wasiirka Ganacsiga iyo Maalgeshiga ha noqdo. Markaa Somaliland dibeddii waa la inaga soo xidhay, anagu haddii aanu mucaarid nahay aanu diyaar la nahay haddii naga nalaga dhuumanayo anaguba waanu naqaanaa sida gaalada loola hadlo, arrimihii dibedda waa la inagu soo handaraabee, anaga ayaa handaraabka kala furaunee ee aynu Ceel-afweyn, Tuko-araq iyo arrimaha dibeddaba aynu gacmaha isku qabsano.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan: - (7Min 41Sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddonka sharafta leh, xildhibaanada sharafta leh, Asaalmu calaykum warax matulaahi Wa Barakaatu.

Waxay illa tahay aad baa loogu baahanaa doodan oo laga hadlo isbadalka ka socoda mandqadan geeska Africa oo aad moodo in waddamo badan oo markii hore ka maqnaa waxay arkeenba soo galay, waddamadan waxa ka mid ah Waddamada khaliijka carabta haddii ay tahay Emirate iyo Haddii ay tahayba Masar, dalalkaa iyaga oo khilaaf ka dhaxeeyo haddana khilaafkoodii way la soo galeen mandaqadan aynu ku nool nahay. Waxa kale oo Iyana jirta in dalkii xooga badnaa ee mandaqadan ku yaalay uu isna is badel ku dhacay Ethiopia. Waad maqlayseen hadalkii ka soo yeedhayey Rawsal Wasaaraha Ethiopia oo toos inoo sameeya. Waxaad aragtaan oo jira in Ethiopia iyo Eretreia hadda ay heshiiyeen, is badelkaas ka dhacaya Gobolka saamayn ayey ku yeesheen siyaasdii Somaliya, waxaad aad moodaa in shaqo ay ka dhigteen Dawladda Faderalka Somaliya ay shaqo ka dhigteen sidii loo waxyeelayn lahaa Somaliland oo loo curyaamin lahaa oo dhaqaalaheeda looga joojin lahaa ama colaadaha ka jira dab loogu sii qaban lahaayeen haddii ay noqoto Tako-raq, haddii ay noqoto Ceel-afweyn iyo haddii ay noqoto mucaaridkeenaba ay dab ku sii qabanayaa.

Arrimahaas oo dhan oo taagan oo ay waligeeda Uinted nation colaadinaysa Somaliland, waxa Iyana dhacday in waddamada EU-da ay Iyana xagaas isu burinayaa arrimahaas oo dhammi ee mandaqada ka socdaa aanay dan u hayan, waxaanu waajibanayaa in reer Somaliland ay aad u fikiraan oo xukumadoodu qiimayso xaalada, in Barlamanka Somaliland xaaladaa cusub ee samaysantay qiimeeyaan ayaa loo baahan yahay, in Mucaaridka Somaliland qiimeeyaan xaalada samaysan tahay ayaa loo baahan yahay, in beelaha Somaliland duruufahan jira xisaabta ku darsadaan ayaa loo baahan yahay, waxa loo baahan yahay in arrimheena guddaha iyo khilaafkeena gudaha wax ka weynbaa taagan in aynu khilaafeedkeena hoos u yara dhignoo bal oo khatarahaas dibad ee inagu socda aynu xisaabta ku darsanaa loo baahan yahay.

Waxaynu u baahan in sawrika weyni inaga lumen oo aynaan faadh faadhin xumaheena, oo aynu eegno waxay wada leenahay waayo waxa jira khalaad badan oo jiri kara markaa waxaan leeyahay waynu xalilaynaa ee yaan sawirka weyni inaga lumen.

Haddii khatar weyni jirto in aynu dhigno oo aynu dhammaanteen waxa waaweyn ee inagu xeeran xisaabta ku darsanaa loo baahan yahay, waxa loo baahan yahay inaynu cududeena midayno maadaama duruufta mandqadu ay tahay sidaas la sheegayo inaynu midaynu u baahan nahay sufuufteena, waxaan soo jeedinaa in khlilaafkeena Guddahah mucaarid iyo muxaafidba aynu hoos u dhigno oo aynu ka midawno waxyaabaha waaweyn ee dalka haysta oo dad badan oo Somaliland diidani jiraan oo 27 sanadood Somaliland cagaha la jiidayey, laakiin maanta ay soo dhiiradeen ilamana aha in Somaliland ay fashilanto in cid Somaliland ahi doonayso. Laakiin hadaynaan gacmaha is qabsanayno oo aynu is wada garab joogsano ayaa loo baahan yahay.

Waxaan soo jeedianayaa in dhammaanteen aynu cududeena mideeno oo gacmaha is qabsano, waxa kale oo aan soo jeedinayaa Guddoomiye in aynu samayno Guddi

Baarlamaan oo soo qiimaysa Xaalada guddo iyo dibeddaba oo talooyinkaas soo jeedisaa xukumada siisa taldaas loo baahan yahay.

Way fudadahay in la is dhaliilo, laakiindhaliishu markaanay waxba toosinay waxyeelo ayey la imanaysaa waxay ila tahay in maanta fadhiga laga kaco ayaa loo baahan yahay oo in Baarlamaan ahaan waxaynu nahay hay'addii wakiilka ka hayd dadka codkeenu meel fog ayuu ku dhacayaa oo la inoo maqlayaa waxaan soo jeedinayaa in saaro guddidaas oo qiimayn soo samaysa. Wabilaahi Tawfiiq.

**Md. Maxamed Faarax Qabile: -(9Min 55Sec)** Bismilaahai Raxmaani Raxiim, horta marka ay wax xunyihiin ama ay hagaagsanyihiin ayaan odhan karnaa wax aan qiimayno, anigu waxaan qabaa siyaasada Arimaha Gudaha iyo Arimaha Dibaduba ay yihiin dheeli ayna u dheelisanyihiin dhinaca (negative-ka), waxaa markaa markaa isweydiin leh Golahani Role intee leeg ayuu ku lahaa qalooca intaa leeg? Waana in dib loogu noqdaa Raad-raaca Taariikheed ee aynu soo marnay sagaalkii sanadood ee ugu danbeeya marka lagu daro labadii dawladood ee u kala danbeeyay xukunka, maxay se dhaxashay xukuumadan cusubi ayaan is waydiin leh.

Hadaba anigu waxaan Qaadanayaa role ka uu Golahani ku lahaa Qalooca intaa lee gee dhacay, hadii aad nabarka iska fogayso oo aad maroodi kale saarto waa ayaan daro, laga bilaabo 2012-kii Dalku wuu sii socday marka aad eegto arimaha arimaha dibadu, xukuumadana tii ayay dhaxashay wax ay ku kordhisayna ma jiro ee xidhiidhkii ayuunbuu dabarku isku saaranyahay.

Waxaan ogsoonahay hashiisyadii ka bilaabmay janti house **2012-**ka 1,2,3, Ankara 1, 2, 3 soo soco waxay iskugu soo biyo shubteen United Arab Emirates ilaa tii Djabuti dhaxalkeediina weynu haynaa wixii uu golahani Ansixiyay ee ahaa hashiisyadii aan Transparent ka ahay ee aan umadan u qalmayn sharafteeda, waana kan maanta doonaya in uu wax dhaliilo, nabad aad adigu gaysatay ma sixi karaysid hadii aanad waaqiciisa aanad is dul taagin.

Waxaana isku meel galay Golihii Sharci Dajinta iyo Xukuumadii, oo safaradii diba loogu baxay ee heshiisyadan lagu soo sexeexayay goleheenani wuu ku jiray, markaa waxaa Meesha ka baxay chek and balance-kii. Maadaamo oo aan inagu ta ugu weyn gaysanay oo hadii maanta la weydiiyo oo la yidhaa maxaad ansixiseen mar jiro qof kaliya oo dadka ay wakiilka ka yihiin u sheegi kara waxay ansixiyeen umadii aan wakiilka ka ahayna dhabarka ayaynu ka jabinay, markaa maxaan xukuumad u raadsanayaa, xukuumadina ma xumaato hadii ay haysato sharci dajin oo wax toosinaya oo xilkii iyo waajibaadkii saarnaa qaadanaya. Anigu waxaan leeyahay Golahani ha is qiimeeyo inta aanu wax kale qiimayn.

Xukuumada kastaana way kaaga tagaysaa maxsuulkuna waxaa uu iskugu soo ururayaa Gole yaasha Sharci Dajinta ayaa ansixiyay, markaa waxaan soo jeedinayaa Qaladaadkii aynu galay waa in aan toosinaa oo aan dib ugu noqonaa, sidaa daraadeed waxay ahayd xukumadan cusibi in ay horta istaago oo ay eegto wixii soo socday oo ay isweydiiso ma sax ayay ahaayeen halkay ku dhamaanayeen, oo ay kala eegto wixii dalka anfacaya iyo wixii aan anfacayn, waxayna dhaxashay wax aan dhaxal noqon karayn taasna weynu haynaa natiijadeeda oo gal-galin cidlo ah ayuu dalku maanta ka taagan yahay siyaasada arimaha dibada waanay inagu soo oodentay.

Waxaana maanta loo baahanyahay laba mid in uu golahani is caliso oo uu 2/3 ku soo jeediyo in sharaftii dalka halka uu ku riday ayay ku jirtaaye waa in uu baneeyaa kuraasta laakiin hadii aan dhaleeco qaybteeda aan leenahay maaweelino waa ayaan daro taasi waxaan kaga tagayaa hadii wax la qiimaynayo waa in golahan la qiimeeyaa ayaa waajiba.

Xaalada dalka iyo Dagaanshiyo la'aantu meel kaliya kamaytaagnay wadanka Ceel-Afweyn ha ugu dhabar weynaatee oo ay ka mid ahaayeen tii ka bilaabantay Xariira, Saylac iyo Berbera oo u gudbay Sool iyo Sanaag oo ay ku ilmo dhashay, taas oo ay keento marka laga tago shuruucda wadanku leeyahay oo maalinta cid la diraa waxba tari maysee dalku sharci ayuu lahaa, xukuumada teedu ha ii danbaysee waa in golahani marka hore is qiimeeyaa waanad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid:-** **(15Min 52Sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiin, shirgudoonka, mudanayaasha, Xog-haymaha iyo Saxaafadaba Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu, waxaan ku horaynayaa xaga arimaha dibada qiimaynteeda waxyaabo badan oo mudanayaashii iga horeeyay soo qaadeena waan ku waafaqsanahay, siyaasadii arimaha diba iyo qiimaytii qaranimadeena wax badan ayaa iska badalay oo aad iyo aad aan ugu soo ururayno ama aan u muuqano maamul goboleed hoos yimaada Somalia, sida aan ka war hayno maamulkii hawada waxaa la wareegtay Muqdisho oo diyaarad aan halkaa laga hagina Hargiesa ma timaado kharaskana halka lagu qaadaana waa halkaa oo xafiis laga wada heshiiyay oo halkaa halagu qaado layidhina ma jiro arinkaana koonfuri wey maroor satay weyna u hirgashay.

Waxaa kale oo aynu ka war qabnaa xujaajtii sanadkan dhoofi lahayd in baasaabooradooda ay xukumadaa Somalia ay u qaadayso una soo fiisaynayso, sidoo kale waxay qaybinayaan xujaajta halka laga keenayo, waxaa kale oo la sheegaya in kastoo aanan anigu arag laakiin la xaqiijinaa in xafiis baasaaboorada lagu sameeyaa oo laga soo magacaabay xamar uu Hargeisa ka furan yahay oo xukuumaduna ka war qabto laguna ilaalinayo, waxaa kale oo aan warkeeda haynaa shirkaa Brussels ee laga hadlayo sidii horaba la iskugu day in Somaliland laga joojiyo heshiiskii hora aan u wada galnay

labadeena dhinac ee ahaa horumarka iyo gargaarka bili'aadamiga ah lagu joojiyo oo ay diideen in ay dib u cusboonaysiiyaan in halkii lagu so af-jari lahaa ay halkaa tahay.

Waxyaabaha oo dhami ma muuqato xukuumad ahaan wixii lagaga hortagi lahaa hadii ay noqon lahayd dhaq-dhaqaaq iyo wax kale toona, markaa halkaa waxaa ka muuqata in ay tahay siyaasadii arimaha Dibada oo inagu soo ururaysa iyada oo ay taasi jirto ayaaad moodaa in tii arimaha guduhuna ay xasilooni darada, tafaraaruqu iyo iska hor imaadaduba ay soo badanayan.

Waxaa kale oo aynu ka war qabnaa arinta tuko-raq oo ay ahayd in ay xukuumadu hogaamiso, waayo iyada ayaa ka masuul ah nabad galyada dalka iyo xuduudaha ilaalintoodaba, oo dadka intooda kale hadii ay noqon lahaayeen Mucaarid iyo Muxaafidba ay ku daba joogaan sida mar hore loogu muujiyay, dhanka kale waxaad arkaysaa nabadii la daawaysanayay oo lagu soo diiday oo waji gabax ah, sida odayaashii ka hadlayay maadaarka oo qadiyadaa oo kale lagu xidh xidhay dad hore, markaa waa in aan ka war helaa in ay xukuumadu iyadu dirtay oo ay ka danbaysay.

Arimahaaga guduhu hadii ay si wanaagsan iskugu xidhanyihiin sawir wanaagsan ayay ka bixisaa taada Dibada. Arintaa Ceel-afweyn ee ilaa xukuumadii hore soo jiitamaysay dhaliisheeda ayay leedahay cidii ka masuulka ahayd ee umada heshiisiinaysay waxna u kala qoraysay odhanaysayna cida mar danbe waxaa samaysa talaabooyinkaa ayaa laga qaadayaa, waxaan qabaa in ay dhaliishaa leedahay hadii ay noqoto xukumadii hore iyo tan danbaba. Waxaanan rajaynayaa fadhigaa ay maanta fadhiyaan hadii loo daayo oo loo gacan banaaneeyo cida loo dhiibayaa waa iyaga'e waxaan rajaynayaa in ay waajibkeeda ka gudan doonto ayaan rajaynaynaa.

Waxaan la qabaa dil-dilaacii iyo tabashooyinkii ay inaga tagtay waxaan mudanayashioi iga horeeyay la qabaa in ay ku xukuumadu daaweyso oo ay ka daba tagto, waxaana marar badan muuqata in wax la isweydiiyo mararka qaar hadana fulinteeda la barbariyo oo aan sideed loo fulin ayaa muuqata, dhanka kale qaranimadu waa mid aan wado leenahay wada ilaashanayno midna waa tu gudeheena ah oo aan ku dartamayno, ee wixii qaranimo ah waa mid aan meel uga soo wada jeedo waana in xukuumadu inagu hogaamiso kuna wada shaqayno.

Mid khusaysa Doorashooyinka guud ee inagu soo socda una baahan in wax laga qabto u baahan oo marka xeerkaa la ansixiyo aanu noqonayn mid sii shaqayn doona hadii aan xaalada taagan laga sii hawl galin waxaana ka mid ah komishankii doorashooyinka qaranka xisbiga wadini wuu qaadacay sababahana waa la hayaa hadii ay noqon lahayd Golaha iyo xukuumaduba oo ka koobnaa 30 Qodob.

Arinkaasina waa mid taagan oo aad moodo in xukuumada iyo komishankuba ay dhagaha ka furaysteen halka lagu socdaana ay tahay doorasho aan la wada galayn oo

degmo aan doorasho u diyaar ahayn cida keenaysa sanduuq iyadaa iman doonta maalintaa oo hadii saddex nin oo ilmaadeer ahi labana dhigan maysaan yidhaad daan midna waan dhiganayaa yidhaa way inoo wada muuqataa in uu Khalkhal ka imanayo ee waxaan leeyahay waar xalkaa ha la doono oo xeer ayaa ina tilmaamayee oo marka eedahaasi yimaadaan Madaxweynaha waxaa ku waajiba oo Qodobka 14aad ee xeerka doorashooyinka ayaa sheegay in uu u saaro Madaxweynuhu Gudi baadhiseed oo gudidaasi waxay soo hesho Madaxweynuhu uu ku go'aan qaato hadii uu kala dirayo iyo hadii aanu kala diraynba intaas ayaa laga laaya'ay madaxweynaha oo uu markhaati noqday oo uu yidhi doorasho xor iyo xaalaal ahna wey qabteen xafiisyadiina wey fureen cabashadaa Waddanina sharci maaha, wax Meesha qabta maaha.

Markaa anigu waxaan qabaa in ay tahay furo laga gali karo oo sidii gudidaa loo magacaabi lahaa oo talada laga galo ayaan odhan lahaa madaxtooyada haloo geeyo, mida labaad saami qaybsigaa dhibaatada uu leeyahay waynu aragnaa, waxaa kale oo aynu aragnaa oo la inaga rabaa kootada iyo Dastuurku sida ay isku waafaqayaan Iyana ka hadalkeeda ayay leedahay iyada oo aan laba diidanayn loona doono tafsiiq sharci inta aynaan gudo galin oo la sii xaliyo dhibaatooyinka hortaan la sii xaliyo.

Arimaha maalgashiga iyo Dekada ee ay mudanayaashu hore uga dhawaajiyeen waan qabaa in golahi khalad wayn ku lahaa oo dadkayagii dibada joogay umo haysano in heshiis idiin yimiday oo ay idiin yimaadeen (term-sheets in respect of conception agreement) iyo (term-sheets in respect of sheer holders agreement) warqad laga soo diyaariyay qodobada heshiiska sida ay mudanayaal badani ku hadlayaan, waar dalkan heshiis lagama ansixin oo dalka iyo dadkaba been ayaa loo sheegayaa mar la leeyahay heshiis ayaa la ansixiyay oo dhamaan beer ayaa loo sheegaya hadii ay noqon lahayd DP-world, Carabta iyo aduunyadaba iyada oo ay term sheet kaa xaga hoose kaga qornayd ayaan loo qaadan inuu heshiiskii dhabta ahaa yahay.

Markaa waxaan leeyahay oo ay daawadu ku jirtaa markii heshiiskaa la maraayay dalku waxaa uu leeyahay xeer maalgashi oo ahaa Xeer lr. 29/2004 oo tilmaamaya cida galaysa heshiis maalgashi iyo qaabka loo raacayaba, marka aan xeerkaa iska laabnay ee maanta wax dalkeena lagu maal galinayo ayaynaan ogayn ee waxa dakadeena kasoo degaya aynaan ogayn, xeerkaa ayaa tilmaamaya ninka maalgashada ahi waxa uu sito hadii ay kaashtahay iyo hadii ay alaabtahayba baanka dhexe ayaa ka qiimaynaya oo xeerkaa dalka u yaal la raaco ayay ahayd. Anigu waxaan aaminsanahay in xeerkaa lagu soo noqdo heshiiska rasmiga ahna la keeno oo dalkani wuu dhacan yahaye ma u talinaa intaa ayaan kaga baxayaa wasalaamu calaykum.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** **(8Min 30Sec)** shirgudoonka, mudanayaasha iyo kaaliyayaasha iyo saxaafadaba waan salamayaa, gudoomiye waxaan jeclhaya aniga oo fahmsan mawduuca laga hadlayaa waxa uu yahay anigu waxaan qabaa in wadnku alxamdulilaah uu ku jiro oo abaartii xumayd ilaahay inaga qaboojiyay oo dalku uu

marayo xaalad wanaagsan oo soomaalidu waxay ku maah maahdaa colaad iyo abaari meel ayay wada joogaan roob iyo nabadina meel ayay wada joogaan way jiraan dagaalo gudeheena oo socdaa oo hadii aad nabarka is tidhaa xog wuu sii damqadaa, maanta alxamdulilaah culimadii, cuqaashii, wax garadkii iyo madaxweyne ku xigeenkuuba way joogaan ee aan u ducayno in alle qaboojiyo.

Arinka tuko-rag dal gooniya maaha ee waa Somaliland taladeedana xukuumada ayaa gacanta ku haysa, waxaanan aad ula yaabanahay protocol-ka iyo shaqada aynu kala leenahay hadii aynu nahay Sharci dajinta, Garsoorka iyo Xukuumada oo xumadu fulinta ayay leeyihiin oo hadii dagaal qabsado Baarlamaanka kuma soo noqonayso ee wixii waajiba ayay ka gudanaysaa, kaliya wada tashi wey yeelan karaan ee waxaan qabaa in aynaan odhan maxaa la inoogu keeni waayay ee aan u dayno cida ku shaqada leh.

Waxa jira arin ay mudanayaasha qaar tilmaameen gaar ahaan kuwa mucaarid ka ahi oo ah in xanaftii doorashada la baabiiyo, waa mid sax ah oo xanafta waa la baabiiyay waana uu isku dayay in madaxweynuhu soo dhaweeyo waxaad xasuusantihii maalintii la samaynayay xil wareejinta iyo loogu yeedhay mucaarid ka oo uu Cabdiraxmaan uu Maqnaa maalintii ay u baxayeen imaaraadkana waa loo yeedhay oo Faysal ayaa raacay markaa waxaan u arkaa in aanu maanta eed ku lahay madaxweynuhu arinkaa, imika lafteeda hadii la leeyahay ha la isku soo dhawaado oo hala heshiiyo waa sax ayaan leeyahay.

Waxaa kale oo aan taageernahay gudidii uu soo jeediyay xildhibaankii iga horeeyay uu ee ahayd gudi soo qiimaysa xaalada dalka iyo baahiyuhu sida ay u kala horeeyaan. anigu arina berbera hadii gudi loo saaro wixii ka soo baxa ayaan ka hadli doonaa, dhinaca kale wax aan ajandaha inoogu jirin in aan la hadlo ilama haboona waana in loo daayo halkay kaga jiraan loona tixgaliyo siday u soo kala horeeyaan iyo siday gudiyada uga soo dhamaadaan, aynu ducaysano barwaaqo ayaan u jirnaaye wasaalamu calaykun waraxmatulaahi wabarakaatuhu.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf: - (5Min 27Sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, hadii aynu golaha nahay waxaan jeclaan lahaa mustawa laga doodayo inay u qalanto baarlamaan wadan leeyahay inay uqalanto oo aanay noqonin mucaarid iyo makale markaa aanay noqonin ee aynu xaalka maanta lagu sugan yahay manuka hadalno uun baa loo baahan yahay waa qaran.........xildhibaan qaran weeye saddex arimood baynu ka hadlaynaa waa dagaalada bariga ,iyo dagaalka tukaraq, iyo somaliland xaalka ay ku sugan tahay saddexdaa shay baa laga hadlayaa nin waliba rayigiisa ayuu si qaranimo ahu dhiibayaa .

dagaalkan bariga ee soo noqnoqday inuu soo noqnoqdo maaha intalanjiskeeda bay leedahay horta waan taageerayaa culimada iyo dadka dhaqanka ah ee meesha tegay waa markii saddexaad ama markii afraad kii tegayna intuu dhaariyuu soo noqdaa dhaartii

waxba tari wayday xabadiibaa kasoo horaysa xukuumadeena somaliland waxay leedahay intalanjiskeeda bay leedahay waa kuwa guryaha u dhaca ee dadka soo qab qabta halkaas hadii la doonayo in wax laga qabto intalanjiskeeda waa ay adeegsan kartaa dawladu xukuumadaasi intalanjiskeedu halkaasuu geli karayaa halkaasaa lagu beeri karaa bartaasaa lagu beeri karaa mashruuc beel walba waa lagu beegayaa nin waliba inaadeerkii baa soo sheegaya marka la qabto ninka xumaha wada halkaasaa lagu toogan lahaa bartaa lafteedaa lagu toogan lahaa.

Intelligence maxay qabtaa? waxa weeye wax alaale iyo wixii nabad gelyadaada ku xun ayay qabanayaan RRU baynu maqalnaa iminka oo aqalo u dhacda halkaas waa laga samayn karayaa intalanjis gudidanina waa ay iskaga imanaysaa goor dhaw dadkiibaa loo kala tegayaa meesha isku dilayay hadaan italanjis la abuurin oo lagu abuurin reeraha dhexdooda dagaalku cimrigiis istaagi maayo waanuu fidi xukuumadu waa ay ka gaabisay waana ay hawl yartahay taasaan anigu soo jeedin lahaa sikaloo lagu nabad gelayaa ma jirto xaga kale ee la leeyahay tuka raq africa waa la qaybsadoo xuduud baa loo sameeyay xuduudkiina weli waa muqadas nin wax ka bedeli karaana ma jiro AU du waxba kama bedeli karto sidiibaa loo ixtiraamay bahalkaas ninka leh waan u dhashay xaqa uu ku leeyahay meeshaa waa inuu ka helaa xaqii siyaasiga ahaa xaqii dhaqaale xaqii madaxtinimo waa inuu ka helaa halkaas.

Cali khaliif aad iyo aad ayuu usoo dhaweeyay arinta waxaan leeyahay xukuumadey xukuumada Somaliland xil iska saar wixii lala bilaabay xukuumadihii hore ay la bilaabeen la jaan gooyo oo wax alaale iyo wixii suurta gal ah ee aan dastuurka kasoo horjeedin ina laysku afgarto oo lasoo dhaweeyo waxaan aad iyo aad uga xumahay nin xisbi mucaarid kamid ah iyo cali baa meel tegay oo soomaaliland bay metelayaan aad iyo aad baan uga xumahay wax la arkayna maaha xukuumadeenu markay cuqaal dirato ama dad madaxtooyo ahna ay diratona meeshii iyadu waa ay maqan tahay waxaan leeyahay taasi waxay ahayd in la samro oo la dagaalamay dawlad baala dhistay 29 biloodbaa la joogaa dadku waa ay ku samrayaan waana ay doonayaan inay ku samraan ilaa ay ictiraaf helayaan waxaan leeyahay halkaas dagaalkaa tukaraq dawladi dawlad waa ay heshiin karaan itoobiya iyo eleteriyaba waa ay heshiiyeen wixii isu haya ee siyaasiiyiin ah ama madaxwayne ha noqoto ama midkale ha noqotee xukuumad baa heshiin karta maaha rin dhaqan markaa xukuumadu xil hayska saarto waxaadna moodaa hadii aan tan somaliland imaado in dabin yari inagu rooray oo meel alaale iyo meel waliba inaga soo xidhmeen afarta dhanba inaga soo xidhmeen waxan dawlad baynu u dirsanay dawlada baynu uga danbaynaynaa.

halkan waxaa laga sheegay DPW iyo berbera aad iyo aad baan u taageersanahay xildhibaankii siciid cartan iyo ninkii ka hadlayba aad iyo aadbaan u taageersanahay nimankaasi waxay ku hadleen waxaan kamid ahay ragii maalintaa lahaa war sharciga keena xildhibaanadii jeelka la geeyay ee aan ee aan xasaanadooda la eegin baan kamid

ahaa maantana waa ay soo noqotay arintii, war hadaanba la eryayn oo waxeenii ay cunayaan 35 sano iyo 25 sano baa lala galay heshiis aynaan arag ma suura gelaysaa kol hadii dhan waliba inaga soo xidhmay inaynu dhaqaale ahaan uga faaidaysano wixii laynoo sheegayay beerahay samaynayaan caafimaad bay samaynayaan iskuulay samaynayaan waxbaa la qodayaa bal inaynu dhankan private sector haday dhanwaliba cidhiidhi inaga gashay bal dawlad yar oo dhanka hoose iska ictiraafta aynu noqonee iyagu mayna caawinayaan 4 ama 5 bilyan malaga amaahan karayaa oo marka amaahda ay ka goostaan ay ina siinayaan bil waliba long term loan ma laqaadan karayaa Central Bank mala kicin karayaa.

Oo inflation iyo sixir bararkan lasheegayo inuu waxka qabto ma suura gelaysaa bal meesha ama ha xadaan ama waxay doonaan ha noqdaane Dp-world ha joogto lakiin si kale malooga faa'iidaysan karayaa? inaku wax malaga amaahan karayaa oo dawladu maka amaahan karaysaa si Baanka dhexe (Central Bank) u shaqeeyo, hadii aan laba eryan sida jabuuti malaga yaaba inaynu heshiiis galno oo ay amaah dheer oo Baanka dhexe (central Bank) uu ku shaqeeyo, oo private Sectorka amaah la siiyo oo wax soo saarkeena hoose bato taas uun ma inoo qaban karaysaa.

**Mrw. Baar Siciid Faarax: - (10Min 17Sec)** bismilaahi raxmaani rixiim golaha saxaafada shirgudooonka iyo martidabada waan salaamayaa salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu bacda salaan arimo badan baa laga hadlay oo xaqiiq ah horta marka u horaysa waxaan soo dhawaynaynaa shirka ka socda ceel afwayn lagu dhex dhexaadinayo dadkaas walaalaha ah ee mudada dheer is hayay waana u ducaynaynaa in ilaahay heshiisiiyo ilaahay maqbuula ka dhigo labadaa reerna waxaanu leenahay maqla dadka oo heshiiya xaalada dalkeenu uu joogo waxyaabo badan baa jira xaqiiqdii waxna duruuf ahaan bay ku dhacayaan waxna dayac ayay ku dhacayaan.

waxaa hada laga hadlay oo xildhibaanadu ka hadleen cali khaliif oo baarlamaan shir ugu haya laascaanood inaguna waa inagan hargaysa ku hayna waxaan u malaynayaa horta taasi waa ciyaaroo wadan saddexaad iyo afraad wiigaga inagu dhaw inagu soo socda ay soo bixi doonaan iyana baarlamaano kale oo somaliland gudaheena lagu shirinayo hadaan imika xaaladaha aan wax laga badalin dalka intiisa badani cidiba war kama hayso cid war ka haysaa ma jirto anigu waxaanba isleeyahay qaarbaaba laga maarmay ayaan filayaa runtii wax badan oo aanan halkan ka sheegi karin baa jirta laakiin waa ay kasii daraysaa hadaan dalka war loo hayn oo laga war helin oo umadu xuquuqdeedii aanay helin.

dhib ayaa jirta ka taagan oo xaqiiqdiina mudo dheer la sheegayay iminkana soo baxday dawooyinka xoolaha lagu daweeyo waa in loo fiirsadaa ayaan leeyahay sababtu waxa weeye dawooyinkaa xoolaha waa lagu dawayn jiray mudo dheer wax ku bukoodana lama arki jirin, iminka dadkiibaa ku bukoonaya waad ogtihiin xingalool beri dhawayd ilaa dhawr iyo sodon qof baa sumoobay waxaa lagu sumoobayaa waa dawadii markaa

xoolihii caanahoodii iyo subagoodiiba waa lagu sumoobayaa wax dadku ku sumoobayo maxaa xoolaha luugu durayaa?

mushkilada taalaa waa taa waxaa kaloo la sheegayaa wakhti wakhtiyada kamid ah gabadh baa iigu timid guriga waxay ii sheegtay meesha oodweyne la yiraahdo in lax lagu dhuftay irbad dabadeedna laxdii markii irbadii lagu dhuftay ayay carartay waa lasoo qabtay way dhimatay waa la haragiiba laxdii wuu ka baxay yacnii haragii iyo hilibkii ismay haysan markaa waxaan leeyahay dawooyinkaa xoolaha lagu dhufanayo dadkiiba ay ku sumoobayaan oo aad ogtihiin wax gurmad ah lagama samayn dhibaato badan baa dhacday xaqiiqdii magaaladaa xingalool ka dhacday oo gobolka sanaag ka tirsan dhawr iyo sodon qofbaa sumoobay dawladu wax gurmad ah oo ay ka samaysay maysan jirin cid dhakhaatiir ah oo loo diray maysan jirin xaaladii lama dersin oo talaabo lagama qaadin markaa arinkaas wasiirka xanaanada xoolaha iyo madaxweynaha iyo haayadaha dawooyinka inoo keenaya intaba dabagal halagu sameeyo oo arinkaas ha la derso.

Dalka waxaa ka jira shaqo la aan baahsan aad u fara badan oo soo kordhaysa jaamacadihiibaa ardaydii ka baxayaan maalin walba kumayaal wax shaqo ahna ma helayaan saasay u tuursan yihiin ilama ahaanayaan inay iska tuunsanaanayaan dalkuna uu nabad iska noqonayo hadaan waxaa wax laga bedelin oo arinkaas wax laga qaban waxaa jira lix walaalo ah jaamacad lixduba ay ka baxeen oo aqoon kala duwan bartay caafimaadkii dhaqaalihii engineernimadii oo lixduba guriga fadhiya oo marka ay cv meel geeyaan aana cvyadooda iyo waxay barteen wax loogu qaybinayn loona eegayn oo sikale iyo aqoon iyo wasiir waxyaabo baydh baydhsan baa lagu qaadanayaa guri 10 qof ay kawada shaqeeyaan iyo guri 6 walaalo ahi intay jaamacad ka baxeeen lixdiiba guriga ay hoganayaan anigu waan idin soo taabsiin karaa markaa waxyaabahaa iyadoo mucaarid iyo muxaafid waxbaa laga fekerayaa lkn mucaarid iyo muxaafid toona ma jirayee dalku hoos buu usii socdaa hadii aan arimihiisa hoos loogu daa degin dagaalka tukaraq waa dhibaato inagu soo korodhay.

Anigu waxaan isleeyahay waana laga fiirsan markii hore waa dhib taagan waan u ducaynaynaa dadkaas in ilaahay kala qaboojiyo ilaahayna bogoodo burcad uu isku mariyo dawladu iyadaa gashaye siday u xalinayso iyadaa looga fadhiyaa iyadaa laga doonayaa dadku inay bilaa micno iskaga dhintaan maahee sidii loo xalin lahaa iyadaa looga fadhiyaa dawlada hadaanay xalinayna haw yeedhaan xisbiyada dabadeedna dee wada jir haloo xaliyo kolay iminka waa dhibaato aynu dhexgalnay magaalada waxaa ka socda caruuruhu waa ay shubmayaan nadaafad la aanbaa ka jirta sidaan maalintii horeba u sheegay qashinku sidaasuu guryaha hortooda u yaalaa dawladu hoose waxay siisay shirkado gura inay dhaqaalaha wadaagaan iyo inay kuwaasi iyagu gaar u leeyihiin magaranayno 7cisho maalinbaa reerka loo imanaya ama 6dii cisho ama 5 cisho qashinka wax waliba waa ay ku jiraaniin dabeedna dunidiiba dukhsi baa qabsaday qashinka guriga hortiisa yaal shirkadu ma qaadayso guriga hortiisa qashinka lasoo dhigo ma adaa

isiinaya bay ku odhanayana hadaan qaado qashinka dariiqaa yaal masaajidkaa agtiisa ka qaada yaa lacagta isiinaya ka lacagta laga siiyo oo keliya bay qaadaan markaa horena waan usoo jeediyay gudoomiye maayarka haloo yeedho weliba dabada halaga gaxeeyo oo hala tuso waxyaabaha aanu sheegayno wadooyinka waad ka war haysaan inkasta oo awoodeenu ay iska yartahay hadana waxbadan oo wax laga qaban.

karo baa jira wadooyin xumo ayaa ka jira magaalada iyo wadankoo dhanba bal horta wadanka kale ha joogee meelaha biyuhu gooyeen iyo laagaha biyuhu gooyeen oo sidii guryaha ku fatahayaan oo soo gelayaan dawlada hoose iyadana waa in arinkaas lagala hadlaa.

anigu gudoomiye waxaanba qabaa in gudi golaha laga qabto oo magaalada soo indha indhaysa dhibtan aanu sheegayno sababtoo ah sidan laguma noolaan karo anigu waan idinka maqnaa lkn waxaa la yiri madaxwaynuhu warqad buu soo gudbiyay kooto uu wax kusoo magacaabay arinkaas waxaan qabaa inaana golaha loo qaybin hadaanu soo socon arinka kootadu ma arinkii horaa ee qolada kulmiye dumarka riwaayada ugu dhigi jireenbaa wakhtiga kaga qaadi jireenbaa ma midkale oo ka duwan baa halkan golaha waxaan ka maqlayaa dastuurkuba ma ogola hadaan dastuurku ogolayn ha noqdo muxuu dastuurku madaxwaynuhu soo qaabilsiiyay qodobkee ma xeerka doorashadaa ma xeer lagu darayaa ma xisbiyadaa kootada samaynaya oo la leeyahay oo waa soo jeedin xisbiyadaa kootada samaynaya ma dastuurkaa la qaabilsiinayaa ma dastuurkaa la furayaa dumarkii waa ay taagan yihiin oo waa ay dawakhsan yihiin hore qoladii horaa dawakhisay kuwanina sii dawakhiyee bal hala cadeeyo dumarka wixii loo keenay hadaan waxba loo hayna.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne): - (5Min 27Sec).** Bismilaahi, dooda aynu maanta u fadhino waxay ila tahay waa mid aad u muhiima, waa dood aynu doonaynu inaynu inagu wax is-tusaaleyno ra’yigaynu qabno aynu tusno, horta marka hore dagaalka ceelafweyn ka socday ee Somaliland shiikheedii, shariifkeedii iyo siyaasigeedii iyo Madax-dhaqameedkeedii isug tageen Illaahay waxaan ka baryaynaa inuu ku soo dhamaado is-afgarad, wanaag iyo dagaalkaas oo joogsada, waligeena waynu isu gurman jirnay oo maaha wax cusub inkasto baaxada gurmadu uu ka wayn yahay kii hore ee Beelaha dagaalama ama is-qabta loogu gurman jiray, rajawayna waynu ka qabnaa waanu soo dhamaanayaa insha’alah. Taasi waa tan gudaheen.

Tan labaad, Dagaalka Tukaraq ka soconaya oo ah waxyaabaha taagan, dagaalkan tukaraq waa mid wadaninimo iyo dawlinimo ah inaguna horta marka hore maynu duulin, ilaa maalintii Somaliland la dhisayna ha noqoto shuruucdeena ama ha noqoto hadalada aynu ku hadlayne waxay ahayd in xadka la gaadho oo dalka xadkiisa la helo, marka dawlad la ictiraafayona waxa weeye inay leeyihiin xad la yaqaano, waynu leenahay xad la

yaqaane waynaan gaadhin, inaguna mabaa’dii baynu ku soconaynaa, qolada aynu is-hayno ee Somaliyana waxaa wax ka duwan oo sare oo somaliya aan jirin waxbana aynaan u hayn iyo iyagoo doonaya wax la yidhaahdo (poverty zone) dhul inoo dhexeeya iyaga iyo inaga oo banaan inay ka dhigtaan arrinta ay wadaana waa sidaas.

Dunida waxa jira wax la yidhaahdo patriotism oo ah wax Wadaniyada ka sii saraysa, qofka wadanka u dhinta ama u gala waaxyaabahaas oo kale ayaa la siiyaa bilad patriotism ah, waxaad moodaa inay inaga maqantahay wadaniyadii gabigeediiba, sababtoo ah ilaa maalintii aynu dhulka joognay inagu waxaynu lahayn nabad baan doonaynaa, nimnaka inaga soo horjeedaana mar walba dagaal iyo xabad bay doonayaan haday gudaha tahay markay garoowe joogaan iyo hadii kale oo xalay waxaad dhagaysanayseen biljimka wuxuu ka lahaa oo dagaal kaga soo hanjamayay, anigu waxay ila tahay maleeshiyadaa dacaska sidata ee uu meesha ku soo ururiyay in aanay Ciidankeenka wax yeeli Karin, laakiin hadaynu shacabkii nahay qaybtii aynu ku lahayn ayaa meesha ka maqan.

Iyagu hub urursi iyo ciidan urursi bay ku jiraan intaas, waxaa la ii sheegay in garoowe dumarkii ay meel ay joogaan ka soo urureen ay kimista samaynayaan oo biyaha lagarab joogaan iyagoo dahabkoodii iyo nafhur samaynaya, inagu halkanaynu liinta ku cabaynaa, wadanku waa inuu gala xaalad dagaal waayo iminka haduu halkaa ka bilaabmay joogsan maayo, baritone Farmaja inta u hadhay soo qaadaya, waad ogaydeeno maamul Goboladooda oo dhan baa intay shireen ayay ku puntland ku raaceen in Somaliland la cunaqabateeyo oo dagaal lagu qaado, markaa waxaan soo jeedinayaa waa inaynu samaynaa tacbiya Caama xaalad dagaal oo waliba Xukuumadana kula talino.

Xaga siyaasada, dee Siyaasada inagu qay baynu ka nahay Madaxweynaha hogaamiya wixii faa’iido ama khasaare ka yimaadana isaga ka masuul ah iyo wasiiradiisa waayo isaga haga siyaasada arrimaha gudaha iyo dibada, wuxuu ku dhaqaaqona waa inaynu taageernaa sax iyo khalad waayo isaga masuuliyadii qaadayee, haduu garoowe cid u dirayo iyo haduu u dirayo Xamar iyo haduu u dirayo Djabuti, waxay ila tahay dadka siyaasada looma wada sheego, waana laba siyaasadu mid gudaha ah iyo dibada ah. Hadalka uu ku hadlo Baarlamaanka Somaliland waa wax caalamka oo dhan laga dhagaysanayo markaa hadlka aynu ku hadlaynaa waa inaynu wax badan ka dhowrnaa.

Siyaasada Arrimaha Dibada, arrimaha dibda saluug badan baa ka jira waa run oo ka muuqata, laakiin DP World anagu waan tagnay dee ma jirto waxan Xildhibaanadu sheegayaan, laakiin waxa weeye Berbera horena waan uga hadalnay hadaanu Gudidda Dhaqaalaha, Gudidda Joogtada ahina way ka hadashay, waxaan leeyahay 60 kun baa ka codeeyay Gobolka Saaxil, boqol baana xidhay Gobolkii, Berbera waa magaalada qudha ee gawaadhida lagu fuudhiyo joomitirku intuu gaadhi kaxaysto uu taabto mitirkiisa, meel kale kama dhacdo, anaga iyo Gudida Joogtaduba waanu ka hadalnay, waa in wax laga qabto arrimahaas oo kale.

Maanta Dhaqaaleheenu wuu hooseeyaa, barigii Ingriisku joogay Degmada dhaqaalaha yar leh kan kale ayuu wax uga soo qaadi jiray, maanta Gudoomiye adhiga iyo Xooluhu aaga Tog-dheer iyo bay ka yimaadaan iyo Sool, Sanaag, Badhan, Oodwayne, Saraar iyo Buuhoodle, shantaas Gobol Xoolaha ka yimaada Burca lagu kala iibsadaa, cashuurtoodana Berbera lagu kala qaadaaaa, taasi ma cadaalad baa taasi, iyadoo wixii ka soo dega dekana halka lagu cashuuro, waxaan leeyahay cadaalad daraa jirta wadanka dhexdiisa, markaa Xeerka Lr. 12 dib ha loogu noqdo ayaan soo jeedinayaa.

**Mudane Gudoomiye, Anigoo soo gaba-gabayna, nuxurka hadalkaygu waa laba xaalo: -**

- In la inaga helo Wadaniyadii oo aynu u diyaargarowno dagaalkaas hubkii iyo ragii oo uu noqdo dagaal kuwajahan umadeenii,
- tan labaad, siyaasada inaynu u dayno cidaynu u dooranay,
- saddex, dhaqaalaha wadanka sidii la isugu dheelirirlahaa bari iyo galbeedba waa in hadaynu nahay baarlamaankii umada aynu ka shaqaynaa,
- waxaan ku darayaa Gudoomiye dad baa dibada inaga caaya oo mar walba yidhaahda Baarlamaanku waa xaaraan, mar yidhaahdaa waa laaluush quutayaal oo walba inagula hadla, Dastuurka Qodobkii 22aad farqada 5aad waxay sheegaysaa in qofka sharaftiisa iyo magaciisa aan meel laga dhici Karin, waxaan arkayay kuwo aan halkan ku ansixinay oo ina baryay bari dhowayd oo habeen dhowayd laha waa xaaraan, markaa waxaan leeyahay waa in la anshaxmariya oo talaabo laga qaadaa oo la-taliyayaasheenu soo eegan.

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaaciil Jirde: - (25Min 30Sec).** Bismilaahi Raxman Raxiim, arrintaas DP World waxba inagagamay baaqan baan u malaynayaa doodeheenii hore wixii aynu ka digaynay uun baana soo baxayo waa taas laga dayrinayo in aan wax dhamaystiran oo xiliyaysan oo daraasad leh aan la inoo keenin, siduu inoo dhaafayna waxba ku noqon mayno, waxaa la yidhi cidii Baarlamaanka wax sheega waa la xidhayaa oo nala xidhaan ka baqanayaa, taas dib u noqon maayo, tii saldhigana waxba kaga noqon mayon waayo wixii laga digayay ee aanu ka hadlaynay ee la moodayay inaanu cid eryaynayno oo dawlad eryanayno baa taagan markhaatiga ha nagala msuugina, taas waan la qabaa ragii ka hadlay aniga laakiin hadal igu baaqday muu jirin oo waaba la igu karaahiyaystay.

Siciid baa ka dhawaajiyay arrin mudoba soo socotay oo la hadal hayay taas oo ahayd turxaantii ka dhalatay doorashooyinka, doorashooyinku markay yimaadaan xanaafiir bay ka tagaan, sidii aynu gudoomiyeheena ku dooranayay halkay inala martay waad ogaydeen inagoo 82 nin ah siday inoo kala qaybisay waad ogaydeen, tan qarankoo dhan ka dhacdaana ka sii daran oo way ka dhib badan tahay, khasaara ka dhashay, dhimasha iyo dhaawac baa yimi, xadhig baa yimi waajibku wuxuu markaa in talaabo ugu horeysa qolaa tidhi C/raxman baa diiday oo dubia u raaci waayay oo Madaxweynuhu turxaanta

wuu bogsiin lahaa haduu c/raxman u raaco Dubia, turxaantu intaas kuma ekaa kumana dhamaato, talaabadii u horaysay anagaa qaadnay iyadoo waajibku ahaa xukuumadu soo qaado, waad ogaydno Alle ha u naxariiste aaskii la isugu yimi Axmed Yasiin Gabixadi aniga intaan Madaxweynaha gacanta qabtay oo u geeyay musharaxii uu codka ka helay, anagaa abuurnay anagaa la nimi oo na looma yeedhinaaa, anagaa intaanu islawaynidayadii iyo candhuuftayadii dib u liqnay u kacnay oo u tagnay, may midho dhalin oo laguma guulaysan xagay ahayd ee waajibkana lahayd waa la garanayaa, markaa taas waxaan u sheegayaa qoladii lahayd C/raxman haduu u raaco way iska dhamaan lahayd.

Asxaabta Qaranku baakoorad la qaato oo lagu xaragoodo maaha, wax sawir lalagalo maaha, hadii wax la waydiinayo si milgo leh oo sharafi ku jirto in loo waydiyo weeye, taas caleemo saarkana wax inoogu horeeyay maaha oo tii Madaxweyne Rayaaleba Madaxweynihii uu ka helay uma tagin kamuuna qaybgalay, khasabna maahee waxay ku xidhan tahay kolba cilaaqaadkiina iyo sida milgaha iyo ixtriaamka loogu sameeyay ku xidhan tahay, taasi waa sidaas oo waxba ku dheeraan maayo.

Anagu niyad Wanaag baanu muujinay, waa tii Madaxweynuhu isugu yeedhay Madaxda Qaranka iyo Asxaata oo Madaxweynihii hore, M/weyne ku-xigeenadii hore, Gudoomiyayaashii iiyo Gudomiye ku-xigeenadii hore, Cali khaliif iyo dadkii talo la bidayay oo wax la iska waydiinayay xaalada wadanka oo taas aynu iminka iswaydiinayno ayaa la iswaydiinayay, waxaa nooga wada markhaati ragii meesha joogay oo noo qiray markaanu nidhi wax alaale iyo wixii aad diyaar u tahay adigu ilayn initiative-ka adiga lehe oo la isma baalyaace, arrinta tukaraq la isma baalyaacayo, taas Ceel-afweyn la isma baalyaaco taladii adiga maanta haya maxaanu kula qabana, balan waxaanu kaaga qaadayna anago xisbi mucaarad ah inaanan kula xantaysan oo tukaraq xaq baanu u lahayn in information-ka nala siiyo oo la yidhaahdo sidaasay wax u dhaceen muraadkayaguna sidaasuu ahaa, suuqaan warka ka qaadanaa anagoo ah Gudiddii Nabadgalyada iyo Difaaca ah makhaayadaha ayaanu warka ka helnaa.

Dawladii Siyaad Barre ayaa nin Wasiiro iminka halkan jooga Magaciisa sheegi maaye ayaa markii ay dagaaladii u kululaa halkan ka socdeen ayaa yidhi Madaxweyne miyaana waajib ahayn inaad oo waranta dareewalkaygaan warka ka qaataaye buu yidhi Saleebaan Maxamuud Aadan buu ahaa, dareewalkaygan warka ka qaata oo Golaha Wasiirada la igama waramo, anagoo Xisbigii labaad oo dalka ah oo 42% helnay oo Madaxdii dalka ka mid ahayn, anigoo Gudiddii Nabadgalyada iyo Difaaca ka mid ah tukaraq warkeeda maqaaxida Cali mataan ee fadhi ku dirirku isugu yimaado ayaan ka qaataa, Shir-gudoonku nooma waramo hadii si gaar ah la idinku soo waramo, hadii xildhibaanada qaar si gaar ah loogu waramo oo ay naga war roonyihiina nooma waramaan, horta arrintu waa taas oo milgo iyo ixtiraam baa la isku leeyahay, nimankayagii sidaad u dhaqmay ee yidhi waanu kula shaqayn oo wax alaale waxaad u

baahan tahaan kula qabanayanaa waad mahadsan tihiin iyo telefoon naga daba yimaada midna ma hayno. Marka waxaan leeyahay hadii la leeyahay cid baa diiday turxaan saarkiyo dubia u raaciwayday xaqiiqadu waa taas, waliba sidaasaanu anagu diyaar nahay inuu Madaxweynahagii yahaya inuu wixii dhibaato dalka ku yimaada kala shaqayno oo kala qayb-qaadano, war baan jirin wax kale daayo.

Arrimaha Dibda, anigu arrimaha gudaha waxba ku dheeraan maayo oo laga waramay, arrimihii dibaba sidii loo sheegay wada-hadalada dawladaa inoola yimi waliba dawlado aynu isku halaynay oo David Cameroon ba soo bilabay oo shirkii London lagu qabtay ee madaxweynaha badan la isugu keenay ka dhalatay, dawladuhuna waad aragto markay halahaas galaan they expended political capital sumcadoodii iyo miisaankay aduunka ku lahayeen bay badka soo dhigayaan oo aduunka tusayaan wayna khamaaraan oo ma doonayaan inay hoos uga dhacaan oo fashilmaan.

Waynu aqbalnay iyadoo aan talo badan laga gaadhin oo heer qaran loo tashan waliba dadka masaakiinta ah ee aan xog-ogaalka ahayn waxaa loo sheegayay inaynu mucaawinooyin badan ku helayno oo wax inoo kordhaya oo waxeena gaar ba la inoo siinayaa, degradation baa ku dhacay  ilaa maalintii London lagu qabtay way soo socotay Turkigaa la isug tagay, qadar baa la yimi, marka dambe Qadar iyo Masar iyo Suudaan in la tagi doona u malaynaa oo graphku wuu soo degayaa oo Dawladihii aduunka ku cuslaa ee la ixtiraamayay hadalkooda way ka soo gudubtay yamyam iyo qadaadweyn ayaa qaadatay.

Marka halka hore joogtay hogaanka inaga haynay oo la ina baryayay oo dawlada somaliya ina baryaysay shuruudana dhigayay oo yidhi dad gobolkan u dhashaay oo masuuliyiin halka ka ahi ma iman karaan oo la inagu ixtiraamayay, maanta hogaankii wuu wareegay oo Koonfur buu wareegaye taas ogaada horta shirka Brussels la fadhiyo qodob baa ku jira ah oo dawlada iyo farmaajo ku adkaysanayso oo intercalation community-gii siday ugu gor-gortamayaan oo si gaar ah inaga inoogu saabsan dawlad goboleedada iska daaye, waxayna ugu qoran tahay in Somaliland waxa la siinayo isaga la soo mariyo, halkaasu maanta gaadhay ninkaynu hogaanka u haynay ee ina baryaynay maanta halkaasu marayaa, inaga xageenay ka timi waliba aynu qirano hadaynaan qiran waaxba ma sixi karno yaynaan dadka been u sheegin, yaynaan dadka maaweelin.

Waxaa taas wehelisa oo sii xoojinaysa markii hore laba qaran oo si siman u wada-hadlaya ayaynu ahayn inaga la ina hor bartay oo xogteena iyo tamarteena dawladaha aduunku ogaayeen, maanta foces-kii wuu inaga wareegay dawlado yamyam iyo qadaadweynaa soo gashay dib u heshiisiinta umada somaaliyeed saddex carqaladood ayaa horyaala ayay u arkaan ilaa kuwaa la xaliyo aanay waxba soconayayn, b) waa Al-shabaab iyo Dagaalka lagula jiro, t) midna waa khilaafkii Dawlad Goboleedyada iyo J) waa Somaliland oo mushkilad hortaala oo laga horqaado ayaynu noqonay  oo mushkilad inaga Al-shabaab si baa la inoo wada arkaa inaynu ku nahay Mushkilad Somaliya oo waa

laga horqaadayaa, inana waxaynu u haysanaa in caalamku sidii laba dawladood oo siman siidhiga la inoogu hayso, sababtuna waxa weeye waa laga jeestay, dawlad ahaan baa looga jooga jeestay iyo qaran ahaana oo maanta Al-shabaab inay mushkilada kowaad tahay, inagu waxaynu nahay mushkiladii labaad, tii dawlad goboleedada waa la xaliyay.

Dawladuhuna markay arrimahaas galaan, Liibiya ka soo qaad Dawlada Ingriiska iyo Faransiiska ku orday oo political capital badan bay ku lumiyeen sharaf iyo sumcad bay ku lumiyeen, arrintaas Somaliland maanta in badan oo dawladahaas waaweyn ee caalamka ah oo arrinta soo ururiyay waxay aaminsan yihiin mushkilada kowaad tahay, tan kalena ay Somaliland tahay, inaguna waxaynu u haysanaa inay xal inoo raadinayaan, waxaan leeyahay soo ceshada sumcadii iyo makaanadii aad ku lahaydeen caalamka iyo dawladahaas, hadaan la soo ceshana Al-shabaab idinka ka soo horaynoo mushkilada kowaad baynu noqonaynaa.

Mandaqada waxaa ka socda maanta isbadal, Itoobiya nidaam cusub oo xawli ku socda oo aad moodo in xawligaas aanu ahayn mid ku dhisan daraasaad iyo macluumaad iyo dabagal ee impulsive ah, itoobiya waxaynu u haysanay inaynu saaxiibkeeda kowaad nahay, Djabuti xurgub baa ka dhaxaysay, Eretria way kala tageen, Suudaan iyo somaliya cilaaqaadku marna way kala tagaan marna way isu yimaadaan, waxaynuna haysanay inagu inaynu nahay saaxiibkooda kowaad ee ay isku halayn karaan duruufo jira awgood, nidaamkan cusub ee yimi nidaamkii wuu ka leexday meelo badan ayuu heshiisyo masaaliix dhaadheer ka samaystay oo 50 sano ee soo socda ayuu ku xisabtamay inagu halkeenii baynu taaaganahay oo aynu leenahay Itoobiya waa saaxiibkena kowaad, dee u noqon mayno saaxiib kowaad haduu danihiisa oo garantiina meelkale ka helo dadkana inagama jecla.

Waliba Taariikh badan oo wangaasanayn baynu wadaagnaa, Meles Zanawi wuxuu isku dayay inuu aaso taariikhdaas oo aanay soo muuqan, ifafaaleheedii maanta in dib loo soo noolayn doonay muuqataa, hadalada laga sheegayo 120 milyan bad la’aanmaayaan nimana geeleedu bada ka cabimaayo aan wax kale ku qabin meesha, war isbadalkaasa meesha ka socda, waxaynu awoodi kariwaynay inaynu dacalka qabsano oo la socona oo khuuradooda ogaano, yaynaan inagu isu muuqan oo afka iskaga boodin isbadlkaas baa mandaqada ka socdee, colaadii Eretria kala gaadhay ee boqolka qof ku dhinteen ee personalized noqotay oo Ra’isal Wasaaraha iyo Madaxweynaha labadaas dal personal enemies noqdeen, maantana waa taas Calankii safaarada Eretria laga taagay Adisababa, inaguna aynaan war ka hayn, saamiga Berbera ay ka heleena inaga abaal inooguma hayaan oo DP World bay ugu hayaan oo intay inaga talaabsanay iyaga 19% siisay, wax alaale iyo waxaynu dhaafsiisanayna ma jiraan.

Waan ayidayaa hadalkii Xuseen lahaa ee ahaa nimankaas aynu Dekadii iyo Saldhigii isugu darnay yaanay wax kale ina sine amaah ma ina siinayaan, dekadeeniina cid kale u geeyay waxay qabanayaan iyo wado ay dhisayaana inooma muuqatee war sicir bararkan

laba iyo saddex milyan oo dayn ah ma ka helaynaa, Itoobiya ayay siiyeen oo waliba iyagu la doontee, inagu maxaynu nahay maynaan dad ahayn, soo taynu ilbaxa ahayn oo Itoobiya oo aan ilbax ahayn baynu jayne iyo Hindiya la shaqaysanaynaye, maxaa inagu dhacay oo bustaha ina saaray, Dawlad uma jeedno anagu oo diyaar baanu u nahay waana naga lilaahi, xaaladii halkaasay maraysaa, nin xildhibaana lahaa iminka dawlada uga dambeeya siyaasada, oo maxaynu nahay inagu markaa? Waad saxaysaa dawlad oo waad la xisaabtamaysaa dawlada.

Mida kale Qabile ayaa ka hadlay eeduu Baarlamaanku ku leeyahay arrimahan oo DP World inaga fududaynay, Saldhiga inaga fududaynay, halkii inaynu kaga hadhno may ahayne waxay ahayd inaynu ka daba tagno oo nidhaahno sharaftayadii baanu u liqnay xukuumada aawadeed, inaga badka Is dhignay, war waxaanu dadka tusno oo dadka ugu abaal sheegano meesha ka keena ilayn waa la ina canaanayaaye, intiina waa taas Cumar Sanweyne yaynaan dawlada ku faragalin.

Tukaraq, waan maqlayay ilaa shalay oo la lahaa wadaniyadii iyo ninka tukaraq ka hadlaa waa sidii nin cadaan la soo saftay oo kale wadaniyadii, Dawladu tukaraq meel Wanaagsan bay dhigtay oo waxaynu caalamka u sheegnay in aynaan dagaal doonayn waxaynu iclaaminay in aynaan garoowe u socon waynuna hakinay xuduudkeenii inaynu tagno, kuma andocoonin oo nabad baanu doonaynaa baanu nidhi, hadalkaas maanta Baarlamaanka ka baxaya ee la leeyahay tacbiya caama ha la sameeyo iyo mobilization hadalkii dawladu iibinaysay dhabar jab buu ku noqonayaa waana inaynu ka fiirsanaa waxaas oo kale, bal dawlada ha lala shaqeeyo oo talada ha loo daayo iyo mobilization ha la sameeyo dee is-qabanmeyso, talo wanaagsan buu Madaxweynuhu gaadhay inkasto ayaamihii hore hadal ka dhadhaacay oo hadaladaasi wax inagu keeneen oo dagaalkii mid qabiil loo dhigay, hadana waxa waajibkeenu yahay dawladu waxay qaaday nidaam ah aynu nabad raadino oo inagu kuwa nabada doonaya aynu noqono, waanuna ku taageersanahay hadaanu mucaaradkii nahay dawlada inay nabadaas raadino kumana canaanayno, diyaarna waanu u nahay, laakiin dee waa in dawlada la xisaabiyo.

Waxa kale oo aan dadku xaq buu u leeyahay Baarlamaanka rido, dadka inagu ma lihin inaga u tagnay oo nidhi na doorta inay ina ridaan, inay wax inaga sheegaan, inay magaan xaq bay u leeyihiin, inaguna xaq uguma lihin inaynu nidhaahno cidii wax inaga sheegta inaynu nidhaahno ha la xidho, ninkii doonaya inaan wax laga sheeginow gurigiina joog, inaga kaliya maahee waa phenomena caalamkoo dhan, waxaynu u haysanaa kabcada dimuqraadiyadu inay ingiriiska tahay, halkan waxaan ku hayaa joornalka daily mail oo markii Teresa may ay ISIS ku duqaysay Suuriya baa Baarlamaanku yidhi inay wax inaga waydiisay ahayd joornaalka qaybta public opinion-ka, wuxuuna leeyahay war nimanka halka fadhiya siyaasada dawlada iyo sirteeda yaan loo sheegin go’aamada waawayn ee qaranka ha laga ilaaliyo, inaguna maantaynu leenahay ninkii wax inaga sheega aynu xidhno, dee isma qabato.

Waxaan ku soo koobayaa anagu dawlada arrinta tukaraq waanu ku raacsanahay nabadaa ay raadinayso, yaynaan dabin galinin, C/wali Gaas wuxuu yidhaahdaa inyar Bariga iyo Galbeedka Hargaysa ah baa dagaalka wada, inaguna iyaga waynu ka boodnaa oo waxaynu nidhaahnaa Farmaja Dagaalkan wada waxaynu ishaynaa waa Puntland, Ciidanka dagaalamayaa waaPuntland, waxaynu caalamka u sheegayno iyo waxaynu dadkeena u sheegayno aynu kala garano, C/wali isaga ha is hayaan ama yaynaan ishayn isaguna wuxuu yidhaahdaa waxaanu ishaynaa Jeegaanta, dhamaanteenba waynu ishaynaa.WSC.

**Md. Xassan Muuse Hufane: -** **(14Min 18Sec)** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Marti-sharafta waxaan ku salamayaa Salaanta Islaamka ASC, waxaan ku bilaabayaa runtii xaalada laga hadlayo ee dalku waxaan odhan karnaa xaalada dalku waxay maraysaa meeshii ugu hoosaysay intii Somaliland jirtay, waxaan ka bilaabayaa anigu xaalada Golaha Wakiilada, Goluhu door intee le'eg buu ku leeyahay xaalada dalka ee lagu jirto dawladu waxay ka kooban tahay saddex waaxood, goluhuna waa waax ka mid ah oo ah tii dadka wakiilka ka ahayd, doorkii uu kaga wakiilka ahaa dadka wuu ka baxa Goluhu oo ma hayo hawshiisii oo way dayaceen waxaana la qabaa Xildhibaan Qabile inuu doorkiisii dayacay golahani.

Tan labaad dagaalada bariga ka socda waa laba dagaal, mid wax weeye waa mid xuduuda lagu gaadhayo waana ku taageeraynaa Ciidamada dalka inaynu xuduuda gaadhno, dagaalka labaad waa kan Ceel-afwayn ka socda ee ergooyinkii u fadhiyaan waana u ducaynaynaa oo ducaynu raacinaynaa.

Waxa dalka jira cashuur maalin walba dekda berbera la kordhiyo, wixii cashuur la kordhinayo waxaa iska leh oo ogolaanaya Golahan, waxaan ognahay macaamiishu noo sheegeen in dhowrkii bilood ee u dambeeyay maalin walba cashuurta la kordhiyo inaguna ma ogin, cid wasaarada maaliyada u fasaxdayna ma garanayno, waxayd in Guiddda Dhaqaaluhu inay ka keenaan cashuuraha la kordhinayo warbixin cashuuraha la kordhinayo.

Arrinta Dekada Berbera, waxaan qabaa anigu dekada berbera xaqul qalin baa la siistay mana haboona siday wax u socdaan maanta sanad iyo saddex bilood baa ka soo wareegtay markii lagu wareejiyay waxay ka qabatayna ma jiraan, waxaan Golaha u soo jeedinayaa inay xukuumada kula xisaabtanto arrintaas.

Gobolka Awdal waxaa ka dhacay duufaano waawayn oo dadkii, duunyadii iyo dhamaan beerihii way baabe'een wax ay xukuumadu ka gaysatay oo wayna ma jirto dhowr jeer bay diyaar dhowr tan qaadaysay gaysay, dadkaasi aad bay u baabe'een wadooyin maanta ma haystaan beerihii way ka baabe'een, xoolihiina way ka dhamaadeen, dadkaas xaalada culus ku jira inay xukuumadu u gurmato iyadaa ka masuule baan kula taliinayaa.

Dalkii maanta waxa aafeeyay waa Musuqmaasuq, maalintii xukuumada kulmiye 2010kii la wareegtay ayaa Hanti-dhowr shaqeeya ugu dambeysay, hantidii umada waa la xalaashaday, dalkii meel xun buu marayaa oo cid alle cid ka hadlaysaa ma jirto, cidii la xisaabtami lahayd waa Golahan, Golahani waa inuu u yeedhaa hay'addaha ku shaqada leh.

Dhinaca doorashooyinka, Xeer baa la keenay maalin dhowayd, waanu ka hadalnay anagu Gobolka Awdal Xildhibaanadiisu waxaanuna ka hadalnay saami, saamigu waa wax mudo badan soo jiitamayay, waxaynu ognahy Maxkamadu inay 2005tii soo jeedisay in lagu doorashadaas oo kaliya ka dibna la saxo saami-qaybsigii, Gobolka Awdalna wuu ka cabanayaa saami-qaybsigaas, Madaxweynuhu shalay wuu noo soo jawaabay war-saxaafadeed buu soo saaray wuxuu yidhi Golaha ayaa ku shaqo leh saamigaas oo halkan ayuu isu soo dhaafiyay, Madaxweynaheynu ka sugaynay inuu saamiga soo qaybiyo oo wax qaybsan Golaha isu soo dhaafiyo, kamaynu sugayn Golaha ayaa qaybinya, dee Goluhu haduu qaybinayo 17 sano ayuu fadhiyay oo uu qaybin lahaa, taasina mid anaga na qabata maaha, waxaan Madaxweynaha iyo Golahaba u sheegayaa in Gobolka Awdal aanu doorasho ku gali doonin 13 xubnood, wanuna isku raacsanahay, macquulna maaha, arrintaasna in laga foojignaado oo Golaha iyo Shir-gudoonkiisu ka feejignaadaan baa soo jeedinayaa.

Dalka sixir barar baa daashaday, sixir bararkaas oo mudo socday, lacagtii way qiimo beeshay, bangiga dhexe ayaana ka masuula qiimaha lacagta, muxuuse dejin karaa lacag badan buu suuqa gashay taaso u baahan in lagu soo cesho bangiga oo loo helo lacag adag, arrintaasi waxay saran tahay Madaxweynaha. WSC.

**Md. Naasir X. Cali Shire: -** **(4Min 09Sec)** Shirgudoonka iyo golaha sharafta leh waan salaaamay, runtii sharaf bay ii tahay inaan ka qayb qaato doodan, uu goluhu soo bandhigayo eek u qiimaynaayo xaalada aw hadan dalku ku sugan yahay,anigu runtii ilaa shalay waan fadhiyay dooda waxa moodaa dadkii halkan ka hadlay inay u badnaayeen, dad dhinac karan, oo dalkana baalaayo iyo wax aan la garanayn farabadan ka sheegaayay, waxaan lee hay balaayo hadhan, waxa kaliya ee waaajib ah in aan tilmaamno si qurux badan inago codkeena aan jabinayn, inaan tilmaamno sida wax u jiraan, cida ku shaqada lah na aan wixii macluumaada u gudbino, looma baahna inuu qofku yidhahdo ma garanaayo, ma ogi, cida talada inoo haysa ee masuul ka ah.

Waxan doonayaa inaan is dul taago, laba sedex qodob oo ku saabsan wixii halkan lagu soo qaaday, waa ta u horaysee waa dekada berbera, DP WORLD intii ay gacanta ku qabatay dakada berbera oo ahayd bishii march 2017, gudida daba galka iyo ilaalinta hantida qaaranka, iyada oo ka wakiila golahan sharafta leh , ee aan fadhino gudoomiye Ayaan ku tagnay booqasho dhamaan waxa la kulanay madaxda DP WORLD ee gobalka joogta , iyo madaxda kale ee uu ka mid yahay mareeyaha dakadaha Somaliland, waxa halkaa nooga soo baxay oon qirayaa horumar baaxad leh, anigu ma garanaayo ka

gobalka ka yimide meesha ay wax ka arkeen, lakiin waxa nooga soo baxay horumar baaxad leh.

Gudoomiye Marka laga hadlaayo qaybta bada ee maraakiibtu fadhido, iyo qaybta loo yaqaano rarista iyo dajinta, qaybta bada waxaan ka sheegayaa in tag cusub iyo pilotkiiba la keenay, 5million dollar ayay DP WORLD ku bixisay,marki hore intii ay Somaliland jirtay tag cusub ma jirin, qaybtaasi horumar baaxadle ayay gaadhay, waana talaabo ay qaaday dawladu, marka laga haadlayoo handring ka qaybta loo dhiibay DP WORLD, waxa aan aragnay qalab casriya oo gudaha meesha ka shaqeeya, oo aanan ahayn sida loo dhigaayo,oo waliba aan odhan karo waxa uu wax wayn ka badalay performance kii shaqadu ku socanaysay, iyo wakhtigii wax lagu raraayay ayaa qalabkiisii yaala meesha.

Containerska waxa loo sameeyay qaab cajiiba qalab baa lagu xidhay sheegi karaayo containerska kale xaguu yaala sheegi karaayo, manta ayad sii sheegaysa marka ayaa waxad aad u tagaysaa isaga oo kuu diyaara ayaad meeshi ugu tagaysaa, waxan odhan karaa shaqooyin qaadan jiray 4 ama 5 ama 6 cisho, ayaa imika lagu qabtaa 6 saacadood oo kaliya

waxa la hagaajiyay securitygii dadka waxa heli jiray gungs. maanta waxa jira qalab cusub ayaa dadka la siiyay securutyga meeshana si wacan ayaa adkeeyay. Waxa la sameeyay tawabaro, groupkii ugu horeeyay ee la soo tawabaray ee shaqaala ah, oo la agaadhsiiyay qaabkii caalamiga ah ayaa imika ka hawl gala dakada, waxana lagu soo tawabaaray dakada DP WORLD ee Thailand ku taala.

Dadka waxa la galiyay caymis, waxa la sameeyay xarumo caafimaad oo meesha dhex deeda ku taala, oo nin DECTOR ah ayaa la qaatay iyo kal kAaliyayaashiishii, Shaqaalaha maanta cida shaqa doonaysaa maaha mid cid gaarihi ka xulato, xafiis gaara ayaa shaqeeya oo qofku cvgiisa la geeyo, baahida jirta waa la iclaamiyaa, si international ah ayaa shaqaalaha loo qaataa, halkana waxa aan ka arkaa dan wayn oo qaranka u soo hoyatay, waxa inii sheegi karaa sanadkaa imika dhamaaday wax yimid hantidhawrayaal caalami ah dawlada iyo DP WORLD isku afgarteen ayaa soo saarayay maxa lacag faaida ah mar aan tagnay Ayaan arag nay iyada oo ay hawshaasi socoto, inta suaalah la waydiin lahaa mala macashay maxa faa’iido inoogu jirtay.

waxan kale oo doonayaa in halkan si cad uga sheego golaha wakiilada waajibaad kiisii qaran waxa uu hawshiisii investmentka caalamiga ah, waxan xasuustaa oo anan marnaba ilaawayn maxamed xaaji ibraahim cigaal alle ha u naxariistee, mar la waydiiyay suaal ahayd maxaa haamaha shidaalka ugu dhiibtay shirkada total? Waar dalkani waxa uu ubaahan yahay cid lagu soo hagto, oo la soo daba galo.

Maanta DP WORLD waxa ay ahayd meel golahani waxa uu gutay waajib kiisii qaran. DP world inta ay meeshi timid magic iyo sharaf ayaa inoo koradhay, maamuus qaran oo Somaliland ah ayaa meel walba inaga tagay maxaa ay aduunku u qori waayeen way

babaday. Waxa la qorayaa in meeshani noqon karto logisticiska mustaqbaleed ee looga adeegaayo, wadamada geeska Africa oo dhan, waxan kale oo si cad u sheegayaa kulankii aan la yeelanay madaxda dakada, waxa ay noo sheegeen oo maalin dhawayd ay cadeeyeen in 400 mitir ee hore la bilaabaayo.

Waxa ay 400 mitir waxa ay gaadhay doonta iyo hamaha eek u taalay meesha la yidhaahdo bada hoosteeda,dabadeedna taasi waxa ay keentay in la iskugu yeedho shirkadihii halkaa iska lahaa ee waxa lagala hadlay in 400 mitir la durkiyo, taasina waxa ay keentay dadka ka cabanaaya, xataa dayrar la xoogay oo ah xaga galbeed ee dakada ku yaala waa meesha uu boobka ugu darani ka dhacay dhulka berbera, markaa dadkii dayrarkii lahaa ayaa meel walba ka qaylinaaya oo leh maxa la noogu soo durqay, waxana ku leehay waa arin nashqadeedii dhisan tahay, dayrarkaasiyi isagoo loo joojiyay wixii ka socday ee shaqo ahayd ayaa halkan la doonayaa in waxa lagu soo gud biyo.

Waxana rabaa inaan ku soo gabagabeeyo, ka gobal ahaan maxay DP WORLD QABATAY? Waxa ay kharash karaysay 770 kun oo dollar, waxa ay samaysay 5ceel, dhakhtarka berbera way caawisay, 2container oo solar energya waxa ay ku caawisay dugsiga SOOS ee sheikh. Ma garan karo dadku waxa ay arki waayeen xaqiiqooyinka dhabta ah ee meesha yaala, taa intaa Ayaan leehay.

Waxa kale oo aan u gudbayaa dagaalka ka socda tukaraq oo dad badani siyaabo kala duwan uga hadleen,waxan cadaynayaa oo farta ku godayaa magaalada la yidhaahda tukaraq, waa magaalo ku taala Somaliland sida hore loo sheegay in xadkii wali laga gudbin,sidii loo cadeeyay wali somaliland xad keedii wali ma gaadhin, waliba iyada oo xagaa marayso ayay nabad ku baaqaysa, anigu waxa inaga mudan horena waxa u jeedinay baaq aan ku taageerayno xukuumadeena dagaalka,waliba in aan xuukumada isku agtaano dagaal kaasi, oo aan waliba laga sheegin baalaayooyine lagu fulinaayo in loo dhigo sida ay tahay oo talo wadaag laga yahay, waayo waxa dagaalka soo qaaday may soo qaadin putland waxan leehay abdiwali dagaal muu qaadin, ilaa farmaajo uu ugu yimid garoowe, oo wasiir kiisa soo diray, oo dagaal dublamaasiyadeed oo cad inagu soo qaaday, oo ay ugu horeeysay in uu civil society ga uu ka faa'iidaysto, in uu wasiir ka tirsan federalka ka tirsan uu soo diro xuduudaha dalka Somaliland, in uu ka hadlay Somaliland oo uu ka soo jeedo, dhamaan waxasi waa dagaal farmaajo ah, dhamaan maamul gobaleedadu waxa ay kuu waafaqeen, goaanka ka soo baxay farmaajo.

Waxan qabaa siyaasad ahaan iyo ka dawlad ahaan inaynaa la mid noqon maamul gobaleed in cid ay somaliya ka soo horjeedana ay tahay Somaliland, cida talaabooyinka qaaday ee raba in jirana waa soomaaliya , waxan rabaa inaan mudanaayasha in awooda saarno oo anay ahayn inaan maamul gobaleed is hayno ee ay tahay inaan is hayno soomaaliya, arinka ceel afwayn ee lagu soo cel celiyay, waar hadii la yidhaahdo maxay labo beelood isku laa yeen, umad dhan ee illaahay ku abuuray ilaa imisay dagaalo sokeeyo soo kala dhex mareen, habiil iyo qabiil oo walaalo ahaa ayaa isku dhuftay, way

iman kartaa dhibaato dadka ka dhex dhacdo, waa sunaha bili aadanka, waxa loo bahan yahay side baa dhibtaa uga hortagnaa, maantana waxa aan ku faarax sanahay oo illahay mahadii ay tahay in ergadii ugu waynayd oo 600 oo qof ka koob nayd in arinka manta u fadhiyaan, waxana ka sugaynaa insha allaah in ay wax wanaagsan ka soo saran.

Kuwa ku dhufanaaya carabka ee leh col CAARE iyo madaxwayne muuse biixi cabdi way wada hadleen, arinkiisuna meel fiican buu marayaa wuuna dhamaanayaa, waxba carabka haku badinina way dhamaanaysaa taasina, waxan doonayaa inaan ku soo gaba gabeeyo inagu waxa nahay xildhibaano golihii wakiilada ah, hadaan meel u baahanahay inaan wax ka ogaano, oo uu meel mad madaw inago galo masuuliyiin qaran baa jirta, waxa nu u baahnahay in aynu masuuliyada qaranka xagan ugu yeedhno oo ay soo fadhiistaan , hadii ay wasiirka arrimaha dibada noqoto, oo aynu doonayno inaanu wax ka waydiino arimihiisa qaranka,waa inaan wasiirka u yeedhnaa, lakiin malo awaalka ha la isla daayo,oo halkan ha loogu yeedho.

Hadii laga hadlaayo dakada in mareeyaha dakada siciid iyo boarka ay leedahay oo cid walba uga xog ogaal san, ee imika jooga ee anaga na og gudi ahaan, wax qorshaysan inaan nu u yeedhno oo wax ka waydiino hawlaha qaranka, markaasaa wax aka arki kartaa waxa saxa iyo waxa khaldan, halkaasaa talooyin kaaga iyo xildhibaan ahaan ka soo jeedin kartaa, waxan kale oo aan soo jeedinayaa inaan nu yeelano faadhiyo xidhan, ma fiicno marka arimaha iyo sirta qaranka ka hadlayno inaynu fadhiyo furan yeelano, waxan soo jeedin lahaa inay fadhiyadani noqdaan fadhiyo xidhan marka aan sirta qaranka ka hadlayno.

Waxa doonayaa inaan in yar ka hadlo waxa imika ku soo kordhy geeska Africa, wax aka dhacaayo isbadal wayn oo loo yaqaano haybo baytalkal change, waxa inoo taala ka qaran ahaan side baan ula jaan qaadi karayna , in la mala awaalana maaha soomaliya e oo la yidhahdo Somaliland baa hadhay oo soomaaaliya ayaa inaga dheeraysay, maaha inaan arintaa la nimaad nee waxa weeyi inaan la nimaadno, straticyadii baa golahan looga fadhiyaa iyo maskaxdii inan keentaan, oo dawlada ku biirisaan stratigiyad oo ay ku hawl galayso oo cad, oo aqliga suuban ee wanagsan ah, side baan ula jaan qadaynaa isbadalkaa ku dhacay, shalay waxan akhriyaay maqaal dheer oo laga qoray isbadalada geeska Africa ku yimiday.

Qoraal kaasi wuxuu tilmaamay cida u horaysa oo khasaaraha u horeeya isbadlka ka dhacay uu ku dhacaya inuu yahay dalka Djibouti, oo waayaysa lacagtii ugu badnayd ee ka soo galaysay badeecadihii laga keeni jiray dalka kale, oo ay Ethiopia ay u wareegi doono, oo ay Ethiopia u wareegi doonta dakadaha ku yaallaa eratariya. Taa macnaheedu maaha sida cad in ay Ethiopia ka maarmayso inay dakado kale yeelato, oo dakadahaasi noqdaan kuwa Somaliland, ama kuwa meelo kale ku yaala, erateria way isticmaali kartaa kuwa Somaliland na way sitoc maali kartaa marna ma odhan waan ka tagaynaa, markaa waxan qabaa arima mala awaalkee xaga xun aad ka eegaysaan xildhibaanayaal, kadaaya

oo qarankan waxa uu u baahan yahay shaqo, iyo caqli iyo maskax oo aad dadka wax ugu taraysan.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caali: -** **(9Min 08Sec)** Mudanayaal sida ay sheegayso ciwaanka doodan aan ku jirnaa, oo ah qiimaynta xaalada dalka, haday tahay mid dhaqaale, mid xidhiidh iyo mid dublimaasiyadeedba waxa aan jeclaan lahaa inay doodinu anay noqon mid ay TV-GA ugu talo galnay oo kaliya, oo ay cid kale la hadalnee oo ay noqoto dood isku dheeli tiran oo wadata soo jeedimo, oo aan wax ugu tarayno xaalada dalka ee kala duwan, wixii aanu talo ka bixinayno.

Anigoo soo gaagaabinaaya arinka amniga oo laba qodob ku soo ururaysa mid ilaah baa ina soo furtoo waa arinkaa imika loogu fadhiyo reeraha is dilay ee inaga ah oo aad moodid in uu inagu dheeraaday, dawadiisii waa la helay oo waa loo fadhiyaaye, aynu ku hambalyaynayno wixii ka soo baxa aynu fulino diyaarna aynu u noqono inaan is garab taagno waayo si wanaagsan bay u bilaabantay meel wanaagsan bay maraysaa waana la ina furtay dadaal badan bay xukuumadu u gashay oo ay iskugu geesay sidii nabad waarta looga gaadhi lahaa illaahay aynu ka barino in uu meesha ka soo saaro wax midha dhala, oo qaranka iyo dadkiisaba dan u ah.

Waxan kale oo aan hambalyaynayaa gudida u fadhida arinkaa ceel afwayn, oo aan nidhaahno waanu idinku taageersanahay waanan idinku garab taganahay wixii ka soo baxa hawshiinana halkaa ka wada waana mid illahay loogu mahad noqo.
Qodabka kale ee aan doonayaa inaan diirada ku saaro waxa weeyi amniga tuka raq, tukaraq marka hore waxa weeyi dagaalku waa la inagu qasbay,dagaalna xumaan maahee wanaag malaha goluhu wuu tageeray arinkaas dawlada wuu isku agtaagay waanan ku hambalyaynayaa ciidanka Qaranak waana mid waajiba, waxan odhan lahaa oo aan soo jeedinayaa inaynu dawladeenu ku dhiirigalino sidii loo samayn lahaa dadaal kasta oo nabad lagu samaynaayo inaynu raadino oo aynu u fasaxno oo ay radiso kuna dhaqaaqdo, waa arin aan leeyahay waa muhiim inaga oo aan xisbiyo kale aan ahayn oo mid xisbi walba ku jirna, maxa yeelay waxa ay doonayaan in ay rayi caalamka ku qanciyaan, inaynu fidma wadayaal nahay inaga iyo madax waynaheenuba. si aan taa u beenino waa in dadaal kasta aan u galno oo ah mid aad u wanaagsan in cid walbana loo fasaxo oo galaysa dadaal nabadna in ay ka soo baxdo soo jeedinaheena aynu bixinayno waa ku raacsanahay.

Waxan u gudbayaa arinka uu naasir si wanaagsan uga waramay, waa gudidii ku shaqada lahayd waxa weeyi baarlamanka labo shaqo ku lee yahay, presentationka marka laga tago labo hawlood oo kale oo ah inuu xeerarka sameeyo, daba galom fulinteedana iwlmd. Mida kalana waxa weeyi inuu oversight sameeyo, ama daba galka sameeyo qaybaha fulinta ee dawlada, doorasha ayay nu ka soo baxnay xasassiyaad badan ayaa jira oo wali sii taagan, waxan odhan lahaa baarlamanku yuuna suuqa warka ka qaadan, sida cabdiqadir noo sheegay inaan maqaaxiyaha ka qaadanay xaq waxa aad ugu leedahay in aad daba gal samayso anigu waxan soo jeedin lahaa inaynu faalayno xaaladaha aynu soo

jeedinayno, oo aynu waraysano wasiirka ay khusayso si aynu inagoo xog ogaala aynu dooda u galno, mid walba waxa uu doona ayu iska qorayaa.

Arinka berbera ee dekada iyo saldhiga inaynu halkan uu goluhu ka ansixiyay, fulinta waxa aan kula xisaabtamaynaa oo aan xaq ugu leenahay ilaa madax waynaha, maxad haysaa heshiiski xaguu marayaa, hawsheedii xagay  maraysaa, hadiise hawshu taagan tahay, arinku dakadu halkii ay taagnayad, sidaasi waxa ay taagan tahay waxba inoogu soo gaadhay,adigu aragtidaadii hore ee aad ku bilawday waxa weeyi alaagaran, waxan odhan lahaa war niyahow markii aan soo galnay heshiiskan, arinkaa waxa aan odhan lahaa aynu xog ogaal u noqono, aynu ku joogtayno daba galka dakada iyo haday saldhiga tahayba, oo aan u yeedhana oo aan waraysano, yaana ina jiidanin aragtida koobani, takale waan soo koobayaa xaalada farabadan oo Sensitive oo balaadhan oo u baahan in si wanagsan aan ula socono, xaaladeena siyasadeed waxa ku weegaaran manta arimo gobalka ah, qaar qaaradeeda iyo qaar caalamiyaba intaba Oo labaduba leeyihiin kala duwaanaashe dhaqaale iyo siyaasadeed iyo mid ijtimaaciyaba.

Waxa moodaa inaan xog ogaal badan u ahayn ku waasi. Waxa aan anigu ku soo koobi lahaa xukuumaa aan u soo jeedino, inay arimahaas golayaashana war ku siiso oo ay iyaduna goaamo dag dag ka qaadato. Oo inaguna wixii talo la hayo aynu soo jeedino, waliba arinka xaga dhaqaalaha iyo xaga siyaasadaba ee soomaalida, waxa modaa inta dhaw samayn bay inagu yeelatay, arinkaa dhaqaale ee maanta bruseles loo fadhiyaana inaga samayn bay inagu yeelanaysaa, hadii aan la qaadin talaa booyin dagdaga oo arimahaa lagu sugaayo, waxa weeyaan waa ay inagu soo foorar sanaysaa, tan Ethiopia lafteedu samayn bay inagu yeelanaysa, ee waa dalkii inoogu dhawaa oo xidhiidh wanaagsan aan la lahayn, arimaheenu na mari jireen hadii uu isbadal ku yimado oo aan la jaan qaadi wayn dhib badan ayaa inoogu imanaysa, waxan odhan lahaa xukuumada aan u soo jeedino, inay arimahaa golayaashana war ka siiso wixii kale ee iyada khuseeyana ay dag dag war uga soo saarto.

**Md. Maxamed Cumar Aadan (jiir): - (14Min 14Sec) W**aad salaaman tihiin, dee horta arimo badan oo anigu aan hayay oo idhaafay way jiraan haba noqoto daahid aan dahee way jiraan , waa laga yaabaa inaan ku soo celiyo markaa iga raali ahaada hadaad aragtaan arimo hore loo yidhi anoo kusoo cel celinaayo, waxaan doonayaa inaan dhawr qodob yar tab tab taa mida ugu horaysiba waxa weeyi wasaaraadka cid kastaba ha noqotee halkan baynu ku siinay ansixintooda, mudaydayu shaqaynayeena runtii waa yartahay, waa dhici kartaa inaad wasaaraadka qaar kood  aydaan war badan ka haynin,ama gabigooda marka la eego midba meesha laga soo gaadhaa yar yahay,waxaan taa ku soo gaabin lahaa dawlada waxa igu la yar haboon inay noqoto albaab furan, oo barnaamijaadka laga yaabo inay haysato wax yaabo secret noqon karaa waa minitaryga uun baan u malaynayaa iyo wax wali processka ku jira, lakiin wixii kale waxa weeyi inay ina soo gaadhsiiso oo ay u samayso la tashiyo aan doorkeena ka helno wasaaraadku ha

noqdeen in ay ina soo gaadhsiin wax badan ama macluumaad badan oo aynu tabayno, oo aynu lee nahay oo aad moodo marka aan hadlayno inaynu cabanayno, oo aynu leenahay wax yaabahaasi inamay soo gaadhin.

Xaga dhaqaalaha marka la eego budgetkeena waynu ognahay wax yaabaha dhibaatooyinka umada haysataana aad bay u fara badan tahay,anigu waxa aan yar tabayaa halkaa in dalabka dad waynaha waxa uu bahan yahay in dib loo hagaajiyo, oo ay dawladu rollkeeda qaadato in uu dhaqaalaheegu sidan yar dhaamo, waynu ognahay inaga wadan keena sedex company ayaa la tilmaamaa, dad yaw farabadan oo aynu odhan kasrno imika oo dad iska ladana ayaa jira, lakiin wax yaabaha dunida dhaqaalaheegu ka yimaado ayaa jira oo wadanku u maro ayaa inaga maqan, dadku sida imika ay wax u wada qabsan lahaayeen ee wax yaabahaa companys ka la yidhaahdo iyo ururadaa sidii loo samayn lahaa, taa waxa u malaynayaa inay qayb ka qaataan umadana wax tar u noqon lahaayeen, wasaarada tan ganacsiga in la yidhaahdo shaqooyinka ay qabanayso ay balaadhiso ay cilmi baadhis ku samayso, in wax yaabaha aynu kari karayno ay baadi doonto, inay dawladu noqoto grand toll, in wixii khasaare ee yimaado ay dadka u celiso,in ay dawladu samayso commercialka waxa la yidhaahdo ee dawlada iyo shacabku wax wada wadaagaan,oo dabadeedna ay sida u wada shaqeeyaan, oo wax yaaba badan oo  la samaynkari lahaa marka wax caynkaayo la samayn kari lahaa la sameeyo, oo warshadaha iyo wixii kale la qabto oo dadkana shaqo loogu abuuri lahaa.

wax soo saarka dadkuna ku badan lahaa ama beero ha noqoto ama wixii kale ee la qabanayo hanoqotee, taana waxan odhan lahaa xaga dhaqaalaha dawladu sidaa ha isku daydo oo ha samayso, dabadeedna cilmi baadhis la sameeyo ayna dadka u furto, inay iyadu u samayso sharciga in loo baas gareeyay, lakiin waxa weeyi in marlabaad la soo ceshoo oo laga fikiroo oo la balaadhiyo dabadeedna sidii dawladu u gacan qaban lahayd dadka ee dadka company yaal ugu samayn lahayd, oo dadka wax taroo dhaqaalahana kor u qaada la sameeyo, waxan odhan lahaa wasaaradaha wasiiradu shaqooyinka ay qabanayaan ay xadidaan oo iyagu ay noqdaan dad kormeel sameeya, wadanka soo mara gobaladoo dhan taga soo qiimeeya, qof waliba wasaaradiisa waxa gobalkaasi uga baahan yahay waxa laga qaban karaayo yaanay noqonin shaqadeenu mid very high centralized noqotoo, oo halkan ku kooban o wadanka gobaladiisa kale aan la tagayn oo ay cabasho iyo niyad xumaan iyo waxaasi imanine, inay noqdaan in iyagu shaqadab kale u daayaan shaqaalaha ee DGGA iyo inta ka hooseeya oo iyagu ay kor meer uun ku yeeshaan oo lagula xisaab tamo, oo ay dabada u baxaan oo ay keenaan sidii dhulkaa waxa looga qaban lahaa, soo qortaan cidii wax la qaban lahayd, iyo ciday doona yaan iyagu ha samaysteene,lakiin in ay iyagu bixiyaan uun oo shaqadoodu noqoto gobalada, oo gobalada qaar koodna ka goaan oo dabadeedna ay niyad xumo timaado,wadanka cabashoyinka qaar kood waxan odhan lahaa wasooradu ha noqdeen,niman socda oo shaqeeya, oo shaqadoodu ayna ku kobnay halkan la fadhiyo oo kaliya.

Halkan kan dadka qaar kood qawadayeen anigu waxa aan u arkaa inaan wax yaabo badan samaysanay,aadna u kornay oo ay dadkeenu qaar ay in doora qabsanay, oo imika

ceel afwayn oo kale may dhici jirin soomaaliland meel labo reer isku laayeen, in mujtamacoo dhani intuu tago sababtu wax kastaba ha noqotee oo dadkii oo dhani iswada raacaan oo waad arkaysaan imika national freedom inuu kuwii hore ka wayn yahay, oo ka qiimo badan yahay oo dadkii doonayaan sidii hore si ka duwan inaad moodid inay soo galayso, kolkaa anigu halkaa waxan u arkaa si positive ba Ayaan u arkaa, ma arko wax qatara. Tan kale ee tukaraq waxan isle yahay ma hawl yara inagu waxa aan ka ogaan karno waayo, meeshu hadii ay dagaal noqoto ma aqaano generlo ayaa inagu jira, lakiin hawsheenu inay secret noqoto Ayaan anigu is idhaahdaa ayaa malaha wanaagsan, lakiin wixii national source ee loo bahan yahay waxa looga bahan yahay in dawladu radio geeda iyo TVGEEDA u isticmaashaan aad u qawadayaa runtii, wax yaabo badan oo umada carqalad ku ah ama sida 100$ ee dibada laa soo diraayo, oo 100$kii aan is dhaafunayno oo geedo siisanayno, ama ha noqoto xidhiidhka dalka ama wax yaabo kale ha noqotee, waxan u arkayaa dawladu halkaa informationkaa aad baan u qawadayaa ama ha noqoto carqalaadka qabyaalada oo kale, ee dadka had iyo jeer iska hor keenaysa ee aan mar marka qaar kood ka qawado ama aan ka baqo in golayaasha la is ee yahay leeder kii umadaa joogta ay ku dhex jirto markaa.

Waxa aan anigu odhan lahaa aan isku dayno in dadku soo yar hagaan asxaabtan aan samaysanay, inkastoo reer la isku tagay badanaaba hadana waxa aan u arkayaa in aan sidii aad u dhaano ka wanagsanahay oo ay caqal cid walba aragtay inayna kaliged isku filnayn, waa talaabo hor waxaana filayaa arkayaa magaalooyin badan inay ka samays meen dhalin yarooyin faarabadan, oo gidigood ka fikiraayo sidii reer nimada looga tagi lahaayo dadku wax u wada qabsan lahaa, dawlada anigu aad waxa aan uga qawadaya ama informationka ha noqoto u gudbinayso ama ha noqoto xumaanaha mujtamacu lee yahay ha noqoto, sidii wax looga qaban lahaa ha noqota radiyoga wax yaabihii u waynaa ee umada qiimo ahaan wax u tari lahaa yaa meesha ka maqan, taas awadeed anigu qoladan waxa odhan lahaa ha isku dayeen in ay barnaamijyo kale oo fara badan furaan oo dadka in badan wax ka tara, idaacada televisionka iyo radiyoogba ay shaqeeyaan oo sida ay yihiin wax ka badalaan.

Waxa nu u bahnahay inagu baarlamanka marka aynu nahay wax yaabo badan oo la inooga war roon yahay baa jira, lakiin waxa moodaa in ay ku koban yihin macluumaad kaasi in qofkii macluumaad ka qofkaasi haysto ayuu ku goaan qaadanayaa, waxa nu u baahanahay in Matalan sharci oo kale marka la samaaynaayo, imika sharciyada qaar kood bay nu leenahay wax baa ka dhinaa ama xaga dawlada halaga soo celiya, inaguna marka danbaan nidhaahnaa wax yaaba ka dhiman, waxan odhan la haa xagaa wasiiradu ha soo fadhiistaan khaas ahaan marka aan sharci samaynayno, xagaa nin sharci yaqaana oo maadada ad u yaqaano ha inoo soo fadhiisto aana ka suaalno, qofku waxa uu doonayom aan ka fahmo ha akhriyo waxa ha garto.

waxaa markuu garto markaasuu goaankiisa ku qadan karaa lakiin marka ay gudidu uun la faqdo had iyo jeer hada iyada oo is leh wax qabta oo aan inagu ku canaananany oo aan ku caayayn, lakiin macluumaad kii iyaga iyo hebal uun bay ku koob naanaysaa, in halkaa

ay yimaadaan oo ay wax ay ka ogaadeen si aan maamulkeena aan ka waraysanaa ninka khabiirka ku ah arinkaa iyaga ah tahay inaan sidaa ku suaalnaa iyo oo aan gudida macluumaad ka qaadano, dabadeedna ay xagaa ku xal gaadhno.

Sida kale runtii waxa is idhaahdaa sidaa laga wanaagsan, umadana hogaan baad u tihiin marka qof waxaa dadka badan kiisu doonaayo huu ku hadlaayo oo uuna qofku rabin dee qayladu ma wanaagsana, waxa kaliya ee uu buuq iyo qaylo dhacaysaa oo waa meeshii la eegayay ee la rabay inuu ka soo baxay wixii dadkan lagu hogaaminayay, qof walaaba waa inaad yeelan kartaa inaad fadhiyi karto baarlamadaba way ka dhacdaa, lakin waa inaad isku daydaa inaad Samir yeelan kartaa oo aad wax ka qayb qaadan karto qofka kale waxa uu ku hadlaayo, dabadeedna hadii aad guntiisa doonaysid oo wixii la soo jeediyay diiday baa kaaga filan, lakiin buuq iyo qaylo iyo in qofkii kale la iska hortaago hadalkiisii waa wax laga naxo raalina ahaada, dee qof walba xaq buu u lee yahay ra yigiisa, waxana odhan lahaa aan isku Dayna inaan iska dayno oo aynu noqono oo odayti nimadeenu ha muuqato.

Waxana ku yar noqon tii dhaqaalaha waxa aan u arkaa inuu aad u hooseeyo, maaha macdan baa la laa yahay, maaha wax yaaba badan baa khalad inooga muuqda ma jiro dunida meel khalad yari ka socon, laakiin anigu waxa aan u aarkayaa dhaqan ahaan in wax inaga dhiman yihiin oo aynaan la hayn wax la yidhaahdo kalsoonida, ee dadku iskugu tago waxxa aad arkaysaa economy companyska buugta marka aad akhrido 5million oo qof ayaa kuwada jira company, oo share holders ah oo aan is aqoon wax bay aamineen , oo principles bay aamineen inagu ma nihin , oo labada walaala ah ayaana lahayn wax isku tiirsiya, markaa dawladeena waxa weeyi hadii ayna kari karayn oo ayna rollkaa qaadin dadkii sidii la isku gayn lahaa, iyadu hadii ay doonto mashaariic intay soo barato iyadu barto, shares furto oo ay tidhaahdo qofki shareka doonaayo waa intaa, dabadeedna halkii aan had iyo jeer bani Aadam kale aan ka baryayno 100$ ayaa wax walba ku qabsan karnaa, markaa taas waxa ugu noqonayaa mujtamaceena waa dhaqan aanan lahayn, dawladu ha isku daydo inay dhaqan kaa wax ka qaban karayso oo ay wax ka qabato intaa Ayaan ku gaba gabaynyaa.

**Md. Maxamed Saalax Cige: -** **(26Min 18Sec)** shirgudonka mudaanayaasha golaha iyo bahda saxaafadaba waan salaamayaa, mawducan maanta uu goluhu ka doodaayo runtii qiimaynta xaalada guud ee dalku, waxan u arkaa mid lagama maarmaan ah madaama oo golahani yahay gole bulshada iyo shacabkaba ka wakiila in wakhtiyada uu fadhigu bilaw yahay in la caadaysto in la qiimeeyo labada kal-fadhi dhexdooda in la qiimeeyo waa mid aan aad u soo dhawaynayo, aad baanan ugu mahad celinayaa mudanayaashii ka hadlay dhawrkaa maal mood ee aan dooda ku jirayna qaabka dooda ay uga hadleen.

Dhawr Qodob baan rabaa inaan dooda ku darsado, waxa kaw ka colaada bulshada Somaliland oo dhani ay runtii dhagta ku wada hayso, aadna uga wada xuntahay oo cid ku farax sani runtii ayna jirin arinta colaadaasi, runtii soomaliland culays badan ayay ku

lee dahay, colaada ceel afwayn oo muda dheer soo noq noqotay waan u mahad celinayaa mudo ilaa lix jeer ayay colaadaasi soo noq noqtay, waxa ay u baahan tahay nabada laga doonayo halkaasi inay noqoto nabad ergayga joogto halkaasi inay ka keento ama isku taxalujiso is afgarad iyo is fahan siin deegaanka iyo dadka iyo dhulkaa ay colaadu ka dhacday inay xooga saarto oo dhibkaa la dhayi waayo, waxa ay noqonaysaa sidii kuwii hore ay run ahaan tii soo noq noqoto, madaama ay dadka Somaliland oo dhami ay ergayga ku dhan yihiin.

waxa aan aad ugu dar daari lahaa arintaasi inay noqoto arin aan mar danbe inagu soo noqon, go'aan keeduna uu noqda mid fula oo awood fulineed leh, oo hadii ay tahay xukuumada iyo hadii ay dadka deegaanka tahay, iyo hadii ay fulinta ergayga lafteedaba oo runtii si xooga dhinacyada looga soo wada jeesto oo uu noqdo go'aan aan dib loogu noq noqon, ama go'aan aan lifaaqyo kale laga daba keenin oo marka hore ay isku dayaan in ay is taxalujiyaan sidii barta khilaafka u abaari lahaayeen. marka taa la helo ee muranka iyo halka dhibtu ka taagan tahay la abaaro markaasaa xalkana la heli karaa oo la dooni karaa.

Markaa ergayga waxan odhan lahaa iyagana inay arinkaa markay labada dhinacba ay arkaan inay khilaafka iyo halka uu muran ka taagan yahay mid bar bilaw ah ilaa iyo maanta halka uu taagan yahay in ay arin kaa aad ugu dhug yeeshaan oo dareen gaara siiyaan, si go'aan koodu unoqdo mid dhamaystiran mid jari kara murankaa mudada badan soo noqnoqday inuu noqdo mid dhamays tiri kara, markaa Ayaan isleehay go'aanku waxa uu noqonayaa mid midho dhal noqon kara oo runtii inaga kaafiya, inuu arinkaa mar danbe uu run ahaantii soo noqon.

Gole waynahana waxa aan odhan lahaa bal arinkaa inuu go'aan adag ka qaato oo uu madaana oo ay inagu bulshada ka wakiil nahay go'aan tageero oo arinkaa lagu xalinaayo, oo halkan laga soo jeediyo mid colaadaa dajinteeda lagu tageeraayo, inay ka mid noqoto qodabeedna qodab ka mida, sidii arinkaa loo xalin lahaa iyo qaabka loo joojin lahaa intaba, taasina runtii waxan odhan laha halagu magacaabo war murtiyeed ama go'aan gole, madaama oo ay colaadaasi ilaa heer qaran marayso maanta in uu goluhu wax ka soo saaro Ayaan aniguna soo jeedin laha.

Qodobka labaad ee ay mudanayashii iga horeeyay wax ka tilmameen nin ba dhinac aragtidiisa ha ka eegee, waa dagaalka tuko-raq runtii goobtaasi waxan arinka iyadoo aan la qabo in Somaliland ayna weerar qaadin ayna jirin oo ay xuduudii iyo runtii dalkii Somaliland, ay iyagu guda joogaan in iyaga la soo weeraray in ay isdifaacaana ay waaajib tahay, hadana runtii sida ay mudanayaasha iga horeeyaya ay tilmaamen waaxa aan runtii ku raac sanahay, oo nabada iyo xabad joojinta ay dhinaca Somaliland sida war saxaafadeedka shalay la soo saaray, ee lagu muujiyay in xaga nabada iyo nabad galyadaba la raaco, aragti ahaan runtii waan ku tageersanahay, arinkaasina sida warsaxaafadeedka ay xukuumadu soo saartay ee lagu tilmaamay  in nabada lagaa

shaqeeyo, ee madaxtooyadu ay dhinaceeda xabad joojinta ay ka samayso madaamo oo ay codsi ka timid dadka caalamka iyo beesha caalamka tiina ay run ahaan tii ogalaadeen.

Inaguna tahay inaan ku tageerno oo baaqaasi uu noqdo mid ay inagu xabada ku joojinayno, iyada oo difaacuna uu xaq dastuuriya uu yahay, iyada oo xabad joojin dhinac kaliya lagaga dhawaaqay oo anan dhinicii kale aan lahayn inayn taasi jirto oo xaq Ayaan u leenahay difaaca dalka iyo xuduudaba, arinkaa tuka-raq arin kale ayaa daba taala oo arimahan danbe soo baxaysa, sida war saxaafadeedka xukuumadu soo saartay ergo ayaa garoowe ka timid xukuumada xog ogaal bay ka ahayd, way ogaayeen inay run ahaantii xagan jogeen, inay ergo nabadeed tahay waa la arkayay oo waa la ogaa xukuumadu waa ay soo dhawaysay ergooyinkaa si ficana waa ay u soo dhawaysay, dad kale oo is xil qaamay way jirtay waxananu ka war haynaa in ergadii xagan ka tagtay, anay reer putland soo dhawaynaynin sida saxaafada iyo wararka aan ku haynay oo ay waji gabax kala kulmeen.

Hadaba su’aasha aan isweydiinaynaa waxay tahay hadii markuu horaba go’aankaa aan qaadanay, ee ay ergadu ay halkan timid in ay xukuumadu faah faahin ka bixiso ergada halkan ay iyadu ogayd ee soo dhawaysay ee hadana iyadu ay ergada u dirtay ee garoowe tagtay iyo in kale? Waxa weeyi anigu waxa aan isleeyahay madmadaw badan ayaa halkaa ku jira tafsiir badana wey u baahantahay. waxan xaga xukuumada ka haynaa in ay soo dhawaysay in ergadaasi Iyana waxay warsaxaafadeedka ay ku sheegtay in ayna ka war hayn, waxaana soo jeedinayaa anigu, madaama oo ay ergadiina xagaa marayso in xogo dheeraada laga raadiyo oo laga waraysto masuuliyiinta ay arintaasi khusayso halkan gole waynuhuna ugu yeedho,

Waxaan kale oo run ahaantii qodob sedexaad ka dhigayaa arin maal mahan dhawayd la isla dhex maraayay oo anaguna saamayn inagu leh hadaanahay Somaliland, waashirka soomaalida loogu qabtay BRUSSELS, shirar badan ayaa jiray ee soomaalida loo qaban jiray oo ah shirar caalamiya ah, oo marar ka qaar kood Somaliland ay qayb ka ahaan jirtay, waxa jira in aan siyaasad loo dhan yahay laga yeelan, shirarka caalamiga ah ee ingiriiska ka dhaca ama wadamada kale ka dhaca sida ay Somaliland ku wajahayso wali siyaasad lagama yeelan, waxa aan ku waja hayno wali arin cad oo xukuumadi soo saartay, ama tii ka horaysa ha ahaatee haba yaraatee ma jirto, waa sababta keentay in mararka qaarkood looga qayb galo maraka qaarna la iska diido, shirarkaasi.

Run ahaantii waxa ay inagu leeyihiin saamayn, oo sida shirarkan imika socday laga soo saaray qaramada midawbay waxa ay ku dhawaaqayeen ama ay indhaha ku hayeen dhaqaale in soomaaliya, loogu ururinaayo ayay ku dhawaaqeen ama ay qabteen, waxa ay tilmameen in dadka dan yarta ah iyo dadkii abaaruhu labadii sano ee u danbeeyay ay saameeyen in ajande wax loogu qabanaayo dadkaa qayb ka mida ayaynu nahay, inta ay yidhaahdeen wax baa loo qabanayaana qayb ka mida ayaynu nahay, markaa run ahaantii samayn badan ayay inagu lee dahay 135 million ee ay ku yabooheen, wax badan oo

magaceena lagu qaadanayo ayaa jirta, markaa run ahaantii waxa qurux badan, sidaa darted waxan ayid sanahay in qadiyadan aw golahani wax iska waydiiyo,

waxan anigu soo jeedinayaa, madaama ay saamayntaa inagu lee dahay oo dadka iyo dalka aynu wakiilka ka ahayn in run ahaantii wasiirka qorshaynta, iyo wasiirka arrimaha dibada labadaba golahani u yeedho , oo uu arrimahaa wax uu ka waydiiyo, sidoo kalana waxa aan soo jeedin lahaa qadiyadan in badan bay soo noqnoqotee, mar marna dad baa loo diraa oo ka qayb qaato, oo si dadban uga qayb qaadata, marmarna waaba sidan imika oo waaba la dafiraayoo xukuumadu waxa ay tidhahdaa kuma jirno, kama qayb qaadano oo waxay tidhaahda somaaliyaa loo qabtay ma jirto soomaaliya wax ay samayn inagu lee dahay, marka waxa aan odhan lahaa goluhu in uu wax badan iska waydiiyo, oo uu bartilmaameedsado in uu siyaasad cad laga soo saaro oo wax sax ah la isku ogaado oo shirar soomaaliya loo qabanayo laga qayb qaadan, iyo in siyaasad laga yeesho, madaama oo mar walba ay samayn teedu ina samaynayso, oo dhaqaalaha la bixinaayo iyo wax walbaa runtii oo la bixinaya ay inagu leeyihiin, inooga soo galayaan waa in wax la iskaga ogaado Ayaan iyadana soo jeedin lahaa, oo arinkaana laga waraysto wasiirka arimaha dibada iyo qorshayntaba.

Sida mudanayaashii hore ka dhawaajiyeen arinta DP WORLD iyo dakada berbera, in badan baa laga hadlay siyaabo badana runtii waa looga hadlay, mid tageera iyo mid ka soo horjeesta labadaba, ka taageerayaana wax uun buu ku taageayaa oo uu lahaa qoraalkii horee halkan la inoogu keenay, waxa ku jirtay 442million ayaa la galinayaa dakadeena horumarin baan nu ka helaynaa, shaqaalaysiin baa la inoo samaynayaa, ictiraaf baa lagu helayaa, waxaasaa qofkaa tageerayi, aw mudanaha tageerayu ama bulshada tageeraysi ku naaloon jirtay, ama ay runtii isku qancin jireen, inta dadka ah ee runtii ka soo horjeeda iyo mudanayaashuba ay ka soo horjeedeen waxa ay aamin sanaayeen, inaanay heshiis cad oo dakada arinkaa ku saabsan oo dawlada Somaliland dhinac ka tahay oo wax un taraya inanay dalka aan la keenid xukuumaduna ayna galin heshiiska, waxaa maal mahaa nu lahayn aynu tageernee heshiis ha la helo, taasi soo dhaaftay oo arin la soo dhaafay bay noqotay, halkii qoladan tageersayd ay taagnayd ma taagn tahay maanta mise way ka sii hoosaysaa, dhibaatada waa ay sii laba laabantay oo ilaa bayac mushtarkeenii ma gaadhay, oo ilaa shaqaalihii dakada ma gaadhay, oo ilaa dakada lafteedii ma gaadhay, arrintu halkii ay taagnayd ma ka sii socotay mise way barar tayoo oo dhaqaalay nu helnayoo, dakadii dalkii nimcay keentayoo, ictiraaf bay keentayoo, arin aad u wayn bay ba noqotay, waxa run ahaantii aamin sanahay in wax nin walba oo caqli lihi uu garan karo, mudada labada sano ku dhaw ee runtii dhaqaala heeniina hoos u dhacay, shaqaalihiina ay wali cabanayaan dhibaatooyin badan oo hor lihi ay maanta dakadii haystaan.

wax lagu kordhiyay oo maanta muuqda ayna jirin, ama la qabtay ayna jirin haday noqoto shaqaalaha iyo dakadaba, xoogaagii ay qadan jireena ay khal khal ka galay, iyo hadii ay noqoto hour markii la rabay in ay ka soo baxdo, qof kasta oo maanta wadanka joogaa oo berbera arkay wuxuu ku qancayaa inayna waxba is badalin, oo ayna Dp world waxa ay

soomaaliland usoo gudbisay aan dhibaato ahayn jirin, aan runtii culays iyo cabaatan ahayn anay jirin, waxa lu na suconaa maalintii halkaa laga ansixiyay heshiiskii aynu garanayno anigu wax aan ku tilmaama garan maayee, qoraalada ahaa maalintii la inoo keenay bayac mushtarku cabashadii ay bilaabeen ayaa ila manta wadaan ilaa maanta waa ay cabanayaan, maalianta cabashada u baayac mushtarku bilaabay ee dakada uu ka bilaabay, ilaa iyo maanta daa aynu taagan nahay cabashadaa uun bay taagan tahay, cid cabashadii uga jawaabtayna ilaa maanta ma hayaan, haday tahay maraakiib la soo xidho, haday tahay soo dajin iyo haday tahay maamulkii dakada lafteedaba.

Ramadaantii baa berbera tagay nin baayac mushtaraa is war waraysanay waxan ku idhi ka waran maamulkii dakada miyayna nimco ahayn, wuxuu igu yidhi maamul DP WORLD la yidhaahdoo aan aragnaaba ma jiro,xafiiskasta marka aan tagno ee aan cabasho u gayno wuxu nagu yidhaahda DP WORLD raadsada, hada xafiiskoodii baan nu joognaa oo ciwaan koodii baa ku qoran, mid kaluu noo sii tilmaamaa dabadeedna ka kalaan u tagnaa wuxu nagu yidhaahda DP WORLD doonta, waxa uu sheegay rag bayac mushatarih cabasho ay cabanayeen ay dubai u tageen, oo xagaa u mareen cabasho darted oo cid la xalisa ayna jirin arinkan dartii.

Arinkaasi waxa uu baahan yahay in dib loogu noqdo hadii golahani heshiis gacanta u taagay xaq buu u lee yahay inuu ka daba tago, oo hadiiina heshiiskii inuu sidii u dhaqan galay ama uuna u dhaqan galin xaq buu u lee yahay, markaa waxan soo jeedin lahaa arintanin culays badan bay kentee, oo dhibaato badana way ku tagan tahaye, bulshadiina cabasho badan bay soo jeedinaysaye heshiiska aan ansixinay halaga daba tago, oo runtii goaan gole halkan haka baxo waa hadaan rabo in bulshadii ina soo doortay wax u qabano, dib aan ugu noqono waxa aan halkan ka ansixinay. Marka laga hadlayo heshiis yada tijaabada hor dhaca ah marka horeba waa la tijaabiyayoo, inuu socnaayo iyo inuuna soconayn dabadeedna waxa la tijaabiyaa inuu soconaayo, waa la ansixiyaayoo dabadeedna heshiskaa ayaa lagu shaqeeyaa, hadii uu heshiisku socon waayo oo ay wax ka soo noqdaan halkasaa lagu istaajiyaayoo cid walba xagii markii hore ahayd uun bay run ahaantii ku noqotaa.

Markaa golahan waxa la gudboon madaama oo ay dhinaatadaasi jirto, madaamoo imika wax inoo soo kordhay inaga dhaca mooyaane ayna jirin arinkaa inaa dib loogu noqdo Ayaan soo jeedin lahaa. Waxana iyadna runtii dul istaagi lahaa qodab iyadana runtii muhim u ah wax badan baa doorashadii aan soo galnay ka dhashay dhibaatooyin badan baa run ahaaantii yimid, haday tahay xag dibadeed iyo gudahaba iyo waliba nabad galyada, beelaha shirayaa waxa ay ka shirayaan waxaa ay ka shirayaan dhibaatooyinkii ka dhashay doorashadii, iyo sidii loo maamulay iyo qaabkii run ahaantii loo galay in xisbiyada qaar kood qaadacaan waxa keenay doorashadii iyo xanaftii ay ka tagtay.

Waxa ay u baahan tahay maadama oo ay maanta xukuumadi taagan tahay, inay dhag u yeelato wax yabihii ina soo maray ee ayna odhani waa loo ma joojiyaan, oo waa looma joojiyaan ay odhane ee ay adraafta iyo dhinac yada ay u yeedho, qaranimada iyo dalka

somliland ay isku daydo inay bad baadadiisa ay ka shaqayso, oo ay wax yaabaha dadku tabanayaan ee ay ka didayaan inay si dag daga oo aan ka daahid lahayn wax uga qabato, madaama oo ay iyadu maanta dalka ay gacan ku hayso ka xukuumad ahaan, oo ayna ka dhaga adkaanin baaqyada iyo weedhaha loo soo jeedinaayo, ee lagu adkaynaayo qaranimada soomaaliland si ay dadka Somaliland ay wax wada yeeshaan ay mod noqdaan.

Waxa taa dhigeeda ah oo iyadana aad iyo aad hoos ugu dhacday nabad galyadii bulshada Somaliland, gobalaa ay nu ku nool nahay waxa mooda in malin ba maalinta ka sii danbayso ay nabad galyadu hoos u dhacayso, kooxo abuurmay ha ahaadaan oo ka abuurmay gobalada, dad runtii meel istaagayo ha ahaadaan oo wadooyinkii dartood nabad galya la an loo mari karayn ayaa jirta, waxa ay u baahan tahay in aarinkasi loogu dhaga yeesho oo dib loo eego, oo suura gal maaha waxa aad arkaysaa 10 habeenimo wixii ka danbaysa, adigaa naftaada u baqaaya marka waxa lagama mar maana in dadkii lagu wacyi galiyo nabad galyada,si nabad galyo loo sameeyo, si nabad galyada aan u ilaalino, iyo sidii aan amaankeena u ilaalin jirnay iyadana aan wax iska nidhaahno.

Xeerar bay nu soo saarnay oo waliba in badan aan ku noq noqonay oo dhawr akhris galay, madax waynuhu soo celiyay hadana dib loo celiyay oo xeerar kale ayay nu ansixinay oo nabad galyada ku saabsan, markaa in xeerar kii la dabaqay iyo in kale sidaa daraadeed waa inaan u yeeshno taliyaha policeka oo aan ka waraysano nabad galyada, iyo wax yaabaha jira ee aad moodo in hogaanka police ku aad iyo aadka uga gaabiyay in laga waraysto Ayaan run ahaantii aan soo jeedin lahaa.

Ugu danbayntii waxa aan doodaydan ku soo xidhi lahaa arimo badan ayaa jira, arimaha waa arimo doorashada ku lug leh weeyaan, waxa laf dhabar u ah xeerkaa doorashada ee golaheena hor yaala, waxa uu u baahan yahay in dhawr dhimac laga eego waxa kale oo aamin sanahay ila sedex meelood laga eego, komishanka doorashooyinka oo aan lagu qabin kal sooni badan, xeerkii oo run ahaantii mad madaw badan la soo galiya, saami qaybsigii oo run ahaanti ku jira, iyo iyada oo la soo galiyay wax aan marki horeba ku jirin oo ah koota ah, sedexdaa arrimood ba waa sedex arimood o oculus.

Waxan aamin sanahay sedex daa arimood ba waa sedex arimood o oculus, oo ah in si heer qarana looga ay ku haboon tahay weeyi, kaliya kuma koobna in golahani aayar uun lka dodo oo uu sameeyo, qaar waxa ay ku xidhan yihiin dastuurka oo isagoona la furin, xeer lama abuuri karo oo qodob dastuuka ka mida oo diidayaa jirta, waxan odhan lahaa arinkaa si gaara ha loo eego arimaha xasaasiga ah, waxan kale oo soo jeedin lahaa gudi gole waynaha iyo shirgudoonka oo isku tagay haloo saaro si ay arrimahaa u soo ururiyaan, oo dabadeedna gole waynaha ha ku soo celiyaan si ole waynuhu goaankiisa uga gaadho. Waad mahad san tihiin.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**